# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Guddiyadda

### Kal-fadhigii 38aad Fadhigii 14aad

**24 November 2018**

**Fadhigu Wuxuu furmay 10:09 AM**

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajendaha Fadhiga: -** Doodda Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Booliska Maalinta 1aad

**Gudoomiyaha: -** Fadhigu wuu inoo furan yahay maanta waxaynu galaynaa doodda Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Booliska sidii aynu u balansanayn, waxaanan ku soo dhowaynayaa Dooda Xildhibaan Siciid Warsame;

**Md. Siciid Warsame Ismaaciil**: Shirgudoonka, Xildhibaanada iyo saxaafada waxaan idin ku salaamayaa salaanta islaamka, markaynu ka hadalno xeerka Booliska , waxaa la saxeexay bishii 12aad ee 2017, markuu qabsaday talada Madaxweyne Muuse waa xeer kii uu saxeexay, intaa hore xeerkani waxa uu ku raagay Golaha, xeerkan markaad eegto wax-ka-beddelkiisa guud ee laga soo sameeyay uma muuqdaan wax sharciga waafaqsan, markaad ka eegto xaga dastuurka, markuu Dastuurku leeyahay qodob walba oo ka hor imanaya Dastuurka waa waxba kama jiraan.

Markaan eego Dastuurka xubinta 1aad qodobkeeda 1aad, awoodaha iyo karaamada qaranka waxa iska leh shacab-ka, wuxuuna u adeegsanaya si xeerka iyo dastuurka waafaqsan, halkaa waxa aad garanaysaa inuu dastuurku siiyay Shacabkan karaamada qarankan Somaliland oo u baahan in ilaalo, sidoo kale qodobka 9aad nidaamka siyaasada ee Somaliland waxa saldhig u ah dimuqraadiyad iyo hanaanka Xisbiyadda badan, taasina waxa ay sheegaysaa inuu dalkani ku dhisan yahay qaab dimuqraadiyad markaan eegno.

Qodobada ay soo celiyeen xukuumadu waxaad moodaa inay soo gaba-gabaynayso dimuqradiyadii, xoriyadii, guud ahaan waxa aad moodaa gudoomiye inay ka hor imanayaan qodabo dastuuriya oo siyaasiya, markaad eegto **Qodobka 1aad** ee awoodaha

Ciidanka Booliska, waxaa halkan lagu qoray awoodaha Ciidanka Boolisku ciidanka Boolisku waxa ay awood u leeyihiin inay qabtaan xidhaan sharcigana horkeenaan cid walba oo Fal-danbiyeed diyaarinaysa isku dayaysa, ama faraha kula jirta iyadoo u racaysa xeerka ciqaabta dalka, xeerka ciqaabta dalka wax la yidhaahdaa ma jirto. **Qodobka 25aad** dastuurka dalku waxa uu leeyahay, qofna lama xidhi karo lamana baadhi karo ilaa ay maxkamadi wax ku cadayso ama waaran maxkamaded la helo ama uu soo gudbiyo Garsoore awood u lihi, qodabkaasi waxa ka hor imanayaa dastuurka **Qodabkiisa 25aad**.

Sidaa awgeed waxaan aaminsanahay in aan qodabkaasi la soo celin, dastuurkana wuu ka hor yimid. ***Waxaanan soo jeedinayaa ama leeyahay qodabkaas sidiisa ha lagu laalo***. Sidoo kale qodabkan kale ee la yidhi xil gudashada ciidanka waxa ku jira qodobo muhiim ah oo markii hore odhanaayay ama u dhignaa sidan Sarkaalka u dira askari ama xubin Boolis shaqo aan ahayn wixii sharciga waafaqsan, isagaa ka masuula wixii ka yimaada, waxaan aaminsanahay inay ku wanaagsan tahay, hadii aan sharciga la waafaqsiin oo ciidanka waxa uu ilalinayaa waxa ku qoran sharciga, ama shuruucda dalka.

hadii aan ciidanku ku shaqaynin sharciga waxa kale ee uu ku shaqaynayaa waa maxay, waxaan odhan lahaa qodobkaa sideedii hore ee aan u dhignay ha loo daayo, guud ahaan xeerka 2\3 ayaynu ku ansixinaynay, manuu shaqayn ee miiskuu yaalay, taa anigu waan ka soo horjeedaa marka horaba, waxa kale oo muhiima Guddida cabashada ee loogu talagalay hadii ay dadwaynuhu Booliska wax ka tirsadaan inay ku cawdaan taasina waa mid aan waafaqsanayn dimuqraadiyada, ***sidaa awgeed waxaan leeyahay Ama aan soo jeedinayaa in sidoodii loo daayo yaan waxba laga bedalin.***

Waxaa hadhay qodobkii la soo celiyay ee odhanayay dadka xabad nool lalama dhici karo, shacabka aan hubaysnayn taasina dastuurka ayaa siiyay in shacabka inay is abaabulaan, inay shucuurtooda muujiyaan waana dimuqraadiyada iyo base ka aan leenahay , sidaa awgeed waxaan leeyahay intii dadka xabad nool lala dhici lahaa, ma qori karno dadka xabad nool halala dhaco, dastuurku wuxuu kor u qaaday in qofka naftiisa lagu dili karin lana xidhi Karin, waxaasoo dhan ayuu damaanad qaaday, hadii aynu nidhaahno dadka ayaan xabad nool lala-dhicin aan hubaysnayn, arintu waxaa weeye dadka xabad nool halala dhaco, waxaan odhan lahaa taasi waxay gef ku tahay dastuurka, iyo xuquuqda aadamaha, waxaan arkayaa qofkii qodobkaa dib u soo dhigay inuu doonaayo, gabood fal uu hadaba u diyaar yahay, oo ah gabood fal xuquuqda aadamaha ah, waxaan leeyahay sidii hore haloo daayo waxbana ayaan laga badalin.

Sidii hore ayuu sax ku yahay oo aan ku taageerayaa Human Right Decaration iyo International ba ee sidii hore ha loo daayo. Intaa waxaan ku soo ururinaayo oo kale, qodabka hada aan ka hadlaayay dastuur keena Somaliland ayay ku cadahay, human right decaration waxaa uu ilaalinayaa dadka fikirkooda iyo inay muujiyaan xabadna aan lala dhici karin ayuu muujinaayay, mar hadii dadka xabad nool hala dhaco , dhamaan qodobadaa la soo celiyay waxa ay u egyihiin kuwa dastoorka Meesha ka saaray, hadii wax lala badalo sidii hore waxa Meesha ka muuqda in Meesha laga saaraayo dastuurkii, sidaa awgeed waxaan leeyahay yaana waxba laga badalin sidii aan hore ugu qornay, wixii wax laga badalaana waxa ay gef ku tahay dastuurka. Dastuurka hadii la jabiyay waynu garanaynaa waxa ay tahay.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin**: Marka hore Gudoomiye arintan aan ka hadlayno ee xeerka Booliska, haday qabasho iyo fal-danbiyeed, baadhis iyo wax la mid ah tahay waxa Aas-aas u ah mabda'a ah qofku danbiila maaha ilaa lagu cadaynayo inuu danbi galay, laba mad da ayaa jira oo mid kaas yahay, ka kalana waxa weeye qofku waa danbiile ilaa inta lagu cadaynaayo, inaanu gelin danbigaa, inaga mabda-eena waxa Aas-aas u ah xeerar keena ilaa inta lagu cadaynaayo inuu danbiile yahay, xadka aan ka duulayna ee number 1 ka ihi waa kaas.

Waxaan aamin-sanahay qodabada ay soo gudbiyeen ee ay soo sheegeen ee ay wax-ka-beddelka ay soo sameeyeen Guddidu iyo Xukuumaduba, inay labo qodob oo Aas-aas ahi ay ku jiraan, waxa kale waa kaabis, iyo Dhamaystir iyo Cadaymo iyo Process.

**Qodabka 16[aad]** ee xukuumadu is-beddelka ku soo samaysay, guddiduna ku soo samaysay, anigu waxaan qaatay ta guddida Ayaa Aas-aas ii ah, waxan leeyahay qodabadu hadaan Boolisku wax qabanaayo ma wixii isagoo gacanta kula jira lagu qabto mooyaane, waxa kale waxa ay u bahan yihiiin inay maxkamadi goyso xadhigiisa, laakiin wixii faraha kula jira Boolisku uma doonayaan maxkamad, haday fal-danbiyeed soconaya oo gacanta lagula jiro oo markaa la qaban qaabinaayo iyo mid dhacay labadaaba way qaban karaan, wixii u baahan in lagu cadeeyo inay maxkamada ka qaataan ogolaanshaha,waa loo bahan yahay.

**Qodabkaa 16[aad] farqada 7[aad]** hadii laga saaro oo ah, ta mabda'iyan hogaaminaysa qodabkaas waxa buraya micnihii oo dhan, markaa farqada 7aad yaan laga saarin ee ah Boolisku xabad nool uma adeegsan karaan dad aan u hubaysnayn haday dhacdana waxa ka masuula cida amarka bixisay, qodabkaa hadii laga saaro waxa lumaysa ujeedaddii ama mabda'a qodabkaasi, waxase la cadayn karaa oo muhiima, hadii Boolis weyna ku

talaalaa **farqada 3aad** oo ah ciidanku Boolisku waxa ay qaadan karaan hub marka ay fulinayaan hawlo shaqadooda la xidhidha. Waxa ay adeegsan karaan xoog ama wax kale ee uu xeerkani ogal yahay oo aan dhaafsiisanayn xadka xeerku ogal yahay.

Hadii ay naf ku bad baadinayaan iyo hadii ay iyagu isku badbaadinayaanba hadii hub loola soo baxo ama awood xeerkana way ku taalaa, waxaan odhan lahaa qodabkaa is badel halagu sameeyo in wax yaabaha yar yarna lagu qoro, ee ay ka mid tahay in kiisaska Qaar kood maxkamada looga qaadan karo waaran ogolaansho, **Farqada 9aad** ***waxaan soo jeedinayaa in halka xukuumadu ku taalo waasaarada arimaha dibada hala ga dhigo,*** lakiin **farqada 7aad** hadii laga saaro mabda'a qodabkaasi wuu lumayaa ee ha lagu ilaaliyo.

Qodabada kale hadaan u gudbo, qodabada badan koodu wixii ka sareeya qodabka 1aad ilaa qodabka 16aad ee imika aan ku jiro waa Procedure oo xukuumadaa soo samayso, uma baahna in wax badan lagu lumiyo waayo mabda'a lumayaa ma jiro, waa Technical weeye, waxaan odhan lahaa sidooda haloo qaato waliba kuwa guddidu soo samaysay.

Markaan ka gudbo qodabka 16aad, **Qodobada 34aad, 35aad iyo 36**aad oo iyaguna muhiima, saddexdaa qodob oo Cutubka 8aad isku ah oo cabashada Booliska ka hadlaayo, waxaan odhan lahaa sida ku taala cabashada, Booliska waa in cid looga cawda ay jirtaa, sida marka horana ku qoran, Booliska waa in sida ku taala qodabkaas ay jirtaa cid looga cawdaa.

Saddex arrimood qodabkaa halagu biiriyo, maxkamadaha iyo meelaha la maraayo ee ah marka hore Booliska ayaa loo cabanayaa waa kaw, marka danbe dagmadaa la tagayaa waa labo, marka sedexaad gobalka ayaa la tagayaa, marka afraadna maxkamada sare ayaa loo gudinayaa, waa Procedure dheer oo qofka muwaadinka ahi tagi karin aan ku soo koobno in marka ugu horayso qofku uu Booliska u dacwoodo, ***Taliyaha halkii uu danbigaasi ka dhacay ayaa awoodaa leh in loo dacwoodo, hadii ay halkaasi waxba ka suura gali waayayaan waa inuu degmada u dacwoodaa, degmadu hadii ay waxba ka qaban kari waydo waa inuu qofkaasi toos maxkamada sare u tagaa waxaan soo jeedinayaa in procedure kaa ha la yareeyooo intaana lagu soo koobo.***

**Qodabka kale Gudidda Cabashada** waa gudi fulineed kama mid noqon karto xeer-dajintu, waayo xeer-dajintu waa halkii guddida looga cabanayay, ***waxaan soo jeedinayaa in laga saaro labada xubnood ee Xeer-dejinta ee ah Baarlamaanka iyo Guurtida oo aanay ka mid noqon***. Waayo waa heer Degmo, waa heer Gobol, siday uga mid noqon karayaan markaa waa in taana laga saraa.

Markaa waxaa kale oo aan odhan lahaa ama aan ***soo jeedin lahaa*** Gudoomiye qodabkaa halagu biiriyo in procedure-ka loo maraayo Maxkamaddaha, ***marka Boolis loo ashkatoonaayo waa in wakhti kooban la siiyaa, 10 maalmood mudo aan ka badnayn waa in Booliska loo dacwooday go'aan ku soo saaraan. Haday ku soo saari wayaan wuxuu tagayaa degmada oo 15 maalmood ay ku soo saartaan go'aan iyaduna. Maxkamadaha ka sareeyana waa in wakhti cayimana la siiyaa iyagana. Maxkamada ugu sarayso waa in ayna bil ka badan intay ku soo saaraysso go'aanka.*** Qodabkaas isaga oo sidiisa u qoran inahaas yar-yar halagu biiriyo.

**Waxaan odhan lahaa ama aan soo jeedinayaa: -**
***Farqada 7$^{aad}$ ee Qodabkaa 16$^{aad}$ laga saaray ha loo daayo, wakhti gaa dheer ha la soo yareeyo, Qodabada kale oo dhami isbadalada lagu sameeyay wax isbadal oo macnae badan is badalaa ku ma jiro waa arimo farsamo iyo procedures waxaan odhan lahaa sidooda haloo qaato.***

**Md. Xuseen Axmed Caydiid:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Shirgudoonka, Mudanayaasha, marti sharafta iyo Saxaafadaba Asc, gudoomiye inyar oo araar ah ayaan ka horaysiinayaaye, xeerarka inoo imanaya ama halkan ka baxayaa marka hore Af-somaaliga ay ku qoranyihiin, waa Af-soomaali ceeb inagu ah in xeerar la adeegsan doono in Af-somaligiisii qaldanyahay oo eray lab loola jeedaa xaraff labbanlaabma uu dhadig u rogo ama uu macnihiiba badelo xeerkaasi waxaa uu noqonayaa mid shaki wax galiya ayuu noqonayaa, xeerarka halkan inoogu yimaadaana waa kuwo aan la sixi karayn, qaabka uu legal darfting kooduna uu aad u qaldanyahay. Hadii marka aad araar u samayso ayna xubnaheeda hoose mid walba aanay araartaa la akhrismin oo hadana mid dhexda ka galiso xeerkaasi maaha mid siiqad kuwada socda.

Golaha maalin horana waan idhiye waa in golaha looga sameeyaa meel legal darafting ka la waafajiyo xeerarka inoo imanaya, waayo halkaa ceeb ayaa ka muuqata quality-gooda iyo Tayadooduba way liidataa.

Booliisku waa inamadeenii oo shaqaynu u diranay, dadka aynu uga diranayna waa inaga, oo ubadkeena iyo lafeheena ayaynu u dirnay, markaa waxaa loo baahanyahay shaqadii aynu u diranay oo horana qawaaniin badani wax ugu tidhi, oo shaqadana mudlaq looguma dhiibine waxaa loogu dhiibay in ay qawaaniin raacaan ayaa loogu dhiibay, oo dadku waa bini-aadam oo mid fudud ayaa jiri kara, mid danleh ayaa jiri kara, mid wax kuu aanaynayaa jiri kara, mid cidi kugu soo qanjiidhisaa jiri kara, mid hunguri qaadaybaa jiri kara waa in loo helaa xakame waa lagama maarmaan oo wixii xeer u jideeyay uu gudan karo wixii kalana lagala xisaabtami karo, dadka lagu fulinayaana waa in ay is ogaadaan, shaqaduna sidaa ayay ku hagaagaysaa.

Mudo sideed iyo labaatan sanadood(28sano) ah ayaynu jirnay, booliiska wax dib u habayn ah oo intaa lagu sameeyayna ma jirto, dhawr jeer ayaan la kulmay dhibaada booliska oo taliyeyaasha aan u cawdayna qaar ayaa odhanayaan booliiska ayaa bah-dilmaya hadii sidaa loola hadlo, oo kuwa kale ayaa eeganaya oo aan hawsha fulinayn. Waar hadii uu boolisku hawsha loo dhiibtay guto ku dalacsii hadii uu ka baydhana ku soo dabaal, oo in uu booliisku xanibnaado oo uu shaqo gudan kari waayana ma fiicna in uu tacadiyana maaha.

Waxaan u soo daadagayaa xeerka, soo jeedintii wax-ka beddelka iyo kaabistii xukuumadu labad qodob oo ay isku dartay oo ah 7aad iyo 8aad oo la isku daray oo ay **qodobka 6aad** ay ka soo saartay oo ah Madaxbaanida iyo shakhsiyada booliiska oo ay laba farqadood bay ka astaysa, ***waxaan ku kordhiyay ama aan soo jeediyay laba farqadood oo odhanaya sidan: -***

***C. Ciidanka boolisku marka uu gudanayo mas'uuliyadaha ku xusan farqadaha "A" iyo "B" ee Qodobka 7aad waxaa uu adeegsanayaa awood (hub iyo ciidanba) ku filan uun wax-ka-qabashada khatarta ka soo horjeedda (proportional pawer) si looga hor-tago wax-yeellooyinka aan loo baahnayn oo ka dhaca hawlgallada Ciidanka.***

***D. Ma'suuliyadaha qodobkan iyo qodobada kale ee xeerkan ama xeer kale ahi Gudashadooda ay ku saarayaan ciidam booliska, looma macnaysan karo in ay ciidanka u bannaynayaan ka hor-joogsiga muwaadiniinta adeegsiga xuquuqaha iyo xorriyadaha ay u dammaanad qaadeen Dastuurka iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah ee dalku.*** Taana halkaa ayaan ku dabray oo aan loo adeegsan karin labadaa farqadood in laga hortagi karo muwaadiniinta marka ay xuquuqdooda Dastuuriga ah gudanayaan in aan loo macnaysan karin.

**Qodobka 11aad ee xeerka oo noqonaya Qodobka 10aad Awoodaha Madaxweynaha.** Sidii aan hore u sheegay Higgaadda erayada wax badan ayaa ka qaldane hala saxo. (Ereyada Ciidanka Taliyaha, Ku-xigeenada, Xukuumadda IWM).

Wasiirka Arrimaha Gudaha ha lagu koobo ereyga Wasiir sida erey bixinta lagu tilmaamay ereyada kale ereybixinta lagu xudayna sidaas oo kale ha loo adeegsado, waayo eray bixintu ereygii dheeraa ee soo noqnoqonayay ayay fududaysaa.

**Farqada 3aad** ee soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista ee gebigeeduba ararta ah, dhexdana u gashay qodobkan 10aad ee soo jeedinta wax-ka-beddelka **kaabista waxaan soo jeedinayaa in laga saaro,** farqadaha la soo jeediyay in lagu kordhiyo qodobkan 10aadna, siiqada uun hala waafajiyo siiqadaha farqadaha 1aad iyo 2aad ee qodobkan tirsiga farqadaha soo kordhayna hala saxo.

**Farqada 3aad**._Madaxweynuhu marka uu darajada bixinayo anigu halkaa waan kala qayb-qaybiya waxaanan **soo jeedinayaa in sidan laga** *dhigo "Madaxweynuhu waxa uu*

*bixinayaa darajooyinka ciidanka ee Gaashaanle ilaa Sarreeye Ciidan ka dib markuu helo codsiga Taliyaha iyo ku-soo-raacidda Wasiirka, markaa halkaa waxaan soo galiyay wasiirka oo wixii hoose daraja siin karo, sida xidigla yaasha oo kale. Taliyuhuna wixii saraakiil xigeen ah ha siiyo"*

**Farqada 4aad.** Madaxweynuhu wuxuu fuliyaa(gutaa) hawlaha kale ee xeerkan iyo xeerarka kale ee dalku ay awood u siiyeen. ***Eraygaa Fuliyaa ayuunbaan u badelay gutaa.***

**Qodobka 12aad.** Ee xeerka oo hada noqonaya qodobka 11aad ee Doorka Wasiirka Arrimaha gudaha **Farqadiisa 3aad** ee u dhigan sidan: currinta xeerarka istrajiyadaha iyo siyaasadaha horumarinta ciidanka booliska iyo ka hawlgalida ansixintooda **waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo *"Curinta Xeerarka, siyaasadaha iyo istaratejiyadaha horumarinta ciidanka booliska iyo u-gudbintooda Golaha Wasiirrada*"**

**Farqada 7aad ee u dhigan sidan**: kormeerka iyo dul kala socodka hawlaha ciidanka booliska Somaliland. **Waxaan soo jeedinayaa in loo Beddelo *"Kormeeridda iyo dul kala socodka hawlaha ciidanka booliska Somaliland"*** waayo siiqada ayaa sidaa u socotay.

**Farqadii 9aad** ee soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista oo noqonaysa farqadda 10aad waxaan ku kordhiyay farqad 11aad ee noqonaysa sidan: ***"uga-warbixinta Madaxweynaha iyo Wasiirrada xaaladda guud ee nabadgelyada dalka."*** Weyka maqnayd intaasi oo waxaa ku qornaa in uu taliyuhuni uga warbixiyo madaxweynaha.

**Farqadii 10aad** ee soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista oo noqonaysa farqadda 12aad una dhigan sidan: fulinta hawlaha kale ee xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya u xilsaaraan. **Waxan soo jeedinayaa in loo beddelo Sidan: *"fulinta hawlaha kale ee xeerkan Ama xeerarka kale ciidanka ee khuseeya u xilsaaraan"***

**Qodobka 14aad** ee soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista oo noqonaya Qodobka 13aad ciwaan ka oo u dhigan sidan: Awooda iyo Masuuliyada Taliyaha guud ee Ciidanka Booliska waa madaxweynaha Commander in chief madaxweynaha ayaa mid walba u ah Taliye Guud laakiin Taliyaha Ciidanka boolisku waa taliaya ciidanka booliska, taliyaha ciidanka Qaranka iyo taliyaha ciidanka Asluubta mid walbaaba taliye u gaara ayuu leeyahay waxaan ka saaray kalmada "Guud" **waxanan soo jeedinayaa in loo beddelo Sidan**: ***"Awooda iyo Masuuliyada Taliyaha Ciidanka Booliska."***

**Farqada 1aad** ereyada Ciidanka booliska Jsl, ha lagu soo koobo Ciidanka ama ciidanka booliska, sida erary bixinta ku xusan oo aanay u noqon erey dheeraada.
**Farqadda 5aad** ee u dhigan sidan; wuxuuna ku ilaaliyaa ciidanka ilaalinta iyo dhawrista xeerarka dalka, qorshayaasha qaran ee amaanka, xeerarka booliska iyo xeerarka kale ee la xidhiidha xilgudasahada ciidanka booliska.
**Waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo Sidan** waanan yara balaadhiyay oo waxaan soo galiaya Dastuuka "***Wuxuuna ku ilaaliyaa ciidanka ilaalinta, dhawrista iyo ku***

***dhaqanka Dastuurka dalka xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya xilgudashada ciidanka booliska iyo qorsheyaasha qaran ee ammaanka dalka."***

**Farqada 8aad** ee soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista xeerka oo u dhigan sidan; waxaa uu madaxweynaha iyo wasiirka arrimaha gudaha la socodsiinayaa xaalada nabadgalyada guud ee dalka. **Waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo sidan:** ***"Wuxuu wasiirka arrimaha gudaha marka loo baahdana Madaxweynaha, la socodsiinayaa xaalada nabadgalyada guud ee dalka iyo kolba waxa iska beddela."*** Waayo Taliyuhu waxa uu ku xidhan yahay wasaarad hadii uu yahay mid Asluubeed, mid gaashaandhig iyo hadii uu yahay arimo Gudana wasaarad ayaa u qaybsan, markaa hadii uu inta uu warbixinta la soo dhaafo halkaa jaran-jaraa dumaysa, markaa waa in ay marka hore wsaarada ku xidhnaadaan oo marka loo baahdo oo gudi nabad galyo isku imaanayso ee loo baahdo ayay warbixin dheeraad ah siin karaan, ama wax gaar ah looga baahdo. Laakiin isga oo Taliyihii kala soo booday ama mar wada siiyay dee halkaasi way ila qaldantahay ayaan leeyahay. "***Secondment "***

**Farqadii 10aad** ee soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista ereyga Hawlgalayaa
**Waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo** "ka hawl galayaa, ereyga barro caafimaad ha la saxo higaasiida "sarraysa waxaa uu odhanayaa sareysa markaa waa in la saxaa erayada

**Farqadii 13aad** ee soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista ereyada helintaanka tababarro aqooneed iyo xirfadeed oo xubnaha ciidanka boolisku helaan gudo iyo dibedba. **Waxaam soo jeedinayaa in loo beddelo:** "Helitaanka tababarro jidheed aqooneed iyo xirfadeed oo xubnaha ciidanka boolisku ka helaan gudaha dalka iyo dibadiisaba. "

**Farqada 14aad** ee soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista oo u dhigan: wuxuu soo saarayaa shaqo-qeexidyada iyo amarada joogtada ah ee ciidanka booliska **Waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo** *"wuxuu soo saarayaa shaqo-qeexayaal iyo amarro joogtada ah oo habeeya, mideeya, joogteeyana shaqada ciidanka booliska."*

Hadaad eegteen soo jeedinta ay xukuumada hada xeerka ee ay soo jeedisay ee wax-ka-beddelka qodob ayaa laba shuruudood ku qornaayeen qodobkaas oo awoodaha iyo masuuliyadaha ka hadlaya Taliyaha ayaa waxaa galay laba shuruudood baa galay, labadii shuruudood waxay yidhaahdeen shuruudo ayay ahaayeen oo waanu ka saarnay sida ay ku sheegeen markii ay sababaynayeen qodob gooni ahna kamay dhigin meel gooni ah oo ay dhigeena ma jirto,lagana maarmimaayo, marka cid xil loo maga caabayo waa in ay shuruudo loo raacayaa ay jiraan, markaa anigu qodob dheeraad ah oo shuruudo leh ayaan halkaa ku soo kordhiya una dhigan sidan:

**Qodob 15aad** ***"sarkaalka loo magacaabayo Taliyaha ama Taliye-xigeenka Ciidanka booliska, waa in uu buuxiyo shuruudaha hoos ku qoran;*** wixii kale ee aan raacin kartaana wey idiin furantahay waxaanan ka asteeyay ilaa saddex Shuruudood;

1. ***Inuu yahay sarkaal sare oo talada ciidanka kaga jira ama kaga soo jiri-jiray kaalin sare;***
2. ***Inuu leeyahay kartida aqoonta, waayo -aragnimadii, haybadii iyo hufnaantii uu ku maamuli lahaa ciidan boolis oo uu leeyahay dal dimuquraadi ahi;***
3. ***Inuu yahay sarkaal aaney hore ugu sugmin fal ama saamayn taban ku yeeshay ama ku yeelan kara hoggaamintiisa ciidanka.***

Qodob lagu soo kordhiyay xeerka soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista ku noqonaya **Qodobka 14aad** oo cinwaankiisu yahay: Awoodaha iyo masuuliyada Taliye Ku-xigeenadda una dhigan sidan;

1. Taliye Ku-xigeenada Ciidanka Boolisku waxay qabanayaan shaqadii Taliyaha guud marka uu maqanyahay ama xalaad caafimaad la soo daristo.
2. Taliye-Ku-xigeenka 1aad ayaa Shaqadii Taliyaha qabanaya marka xaaladda ku xusan faqrada 1aad ee qodobkani timaado, haddii Taliye ku-xigeenka 1aad maqan yahay ama ay ku timaad isla xaladaasina Taliye Ku xigeenka 2aad ayaa shaqadii Taliyaha guud qabanaya.
3. Taliye-Xigeenadu waxa kale oo ay qabanayaan shaqo kasta oo Taliyaha guud u igmado.

**Waxaan soo jeedinayaa in sidan loo beddelo qodobka 14aad; Awoodaha iyo Masuuliyada Taliye-xigeenada;**

1. Taliye-xigeenadu waxay Taliyaha ka kaaliyaan gudasha xilka Taliyenimo, waxaanay qabanayaan shaqo kasta oo Taliyuhu u igmado oo la xidhiidha masuuliyadaha Taliyaha;
2. Hadii uu Taliyuhu uu kaga maqan yahay xafiiska, Fasax, shaqo dibadeed, caafimaad-daro IWM, Taliye xigeenka 1aad ayaa xilka ku sii simaya; haddii uu Taliye-xigeenka 1aad kaga maqan kaga maqanyahay xafiiska duruufaha ka mid ah kuwa farqadan ku xusan, waxa Taliyaha xilka ku simaha Taliye-xigeenka 2aad hadii uu Taliye-xigeenka 1aad, ku soo laabto xafiiska ka hor intaanu Taliyuhu ku soo noqon isga ayaa la wareegaya xilka ku-simaha Taliyaha.

Intaa aan ka hadlaayay gudidu waxba kamay odhan oo waxay yidhaahdeen sideeda ha loo siidaayo, anigu waxaan u arkaa wixii aan ka soo hadlayay in ay baahi loo baahanyahay ay tahay oo aynu xeerka ku wanaajino oo aynu galino ayay iigu muuqataa

Waxaan u galayaa qodobkii **Qodobka 16aad ee** soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo kaabista iyo Talo bixinta Guddida **waxaan soo jeedinayaa in loo beddalo sidan Farqada 1aad** *"**In ay qabtaan, xidhaan, Maxkamaddaha awooda u lehna ku horgeeyaan mudo 48saacadood cid kasta oo fal-denbiyeed diyaarinaya, isku dayaya, amaba faraha kula jirta iyagoo u raacaya si waafaqsan Dastuurka, xeerarkan iyo xeerarka kale dalka.**"* Waxaan halkaa ka reebay sida uu sheegayo Qodobka **25aad Dastuurku** oo sheegay in aan sina qofka loogaga qaadi karo si aan xeerka waafaqsanayn, farqadiisala badaana waxay odhanaysaa ma bannaana in qofna la qabto, la baadho ama la xayiro hadii aanu

markaa fal-danbi faraha kula jirin. Hadii aanu markaa faraha kula jirin oo uu shalay kula jiray waaran ayaa lo soo goosanayaa oo qaybta danbe ayaa xukumaysa waxaaynay leedahay Ama aanu amar qabasho oo sababaysan aanu ka soo saarin Garsoore awood u lihi, farqad sadexaad ayuu Dastuurku waajibiyay oo wuxuu yidhi Dawlada ayaa muwaadiniinta u damaanad qaadaysa xuquuqda iyo xoriyadaha, in sidaa la yeelayo waa masuuliyada ay xukuumadu damaanad qaadayso ee Khasab ay tahay in ay fuliso dadka. Waliba waxaa lagu sii daray xeer ayaa qeexaya ciqaabta ka dhalan karta ku xadgudubkooda, fal ay ahayd in waaran lagu qabto hadii waaran la'aan loogu gal, guri ay ahayd in waaran lagu galo, waxaas oo dhamin waa fal-danbiyeed uu Boolisku sameeyay waana ku xad gubid qawaaniinta ah, ciqaabihii ka dhalanayay xeerkii waa jibinayay keebuu noqonayaa? Ma isweydiin karnaa in aan xeerkan wax kaga astayn karno, oo 27sanadood ayaynu maraynaaye ma bilaa xeerkaa ayuunbaa guryaha loogu dhacayaa aan waaran loo qaadan? Taasi waa dhaliil baan is leeyahay ay Golayaashu leeyihiin, markaa iyadoo halkaa waxaan u reebay qofka fal-danbiyeen markaa faraha kula jira inay qaban karaan oo maxkamada 48saacadood gudo hood ku horgayn karaan iyaga oo raacay Dastuurka, xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya.

**Farqada 2aad iyana waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan** "***Inay baadhaan iyaga oo uga qaadanaya amar garsoore awood u leh waaran baadhiseed oo sababaysan cid kasta oo lagu tuhmo in ay abaabulayso ama qorshaynayso fa-dembiyeed ka dhan ah nabad-galyada dalka, nafta iyo maalka muwaadiniinta iyo dadka shisheeyaha ah ee dalka jooga ama dhex-maraya."*** Hadii uu meeshaa shaki soo galo yaanay xadhiga uu ku horayne waaran ha soo qaataan oo baadhistu ha horayso, oo markaa qabasha hada ha uga gudbaan oo hadii ay galaan in guri wax lagu qorshaynayo ay galaan qofka wax qorshaynayaa isagaa al-baabka ka boodaya ama rasaas kala hor imanaya markaa waabay imanaysaa in ay wax ka qantaan ***"Secondment"***

**Farqada 3aad waxaan soo jeedinayaa in la dhigo sidan "*Hadii ciidanka ay baadhitaankaa, ku helaan cadaymo sugan waxa u bannaan in ay qodka qabtaan, xidhaan maxkamadda awoodda u lehna ku hor-geeyaan muddo 48saacadood ah.*"**

**Farqada 4aad waxaan soo jeedinayaa in sidan laga dhigo *"Haddii ciidanka boolisku waxay isticmaali karaan awood ciidan oo ku filan uun wax-kaqabashada iska-caabinta ay cidi kala hortimaado, marka ciidanku u gudanayo waajibaadkooda shaqo si waafaqsan Dastuurka, xeerarka kale ee dalka."*** Marka uu Dastuurka iyo xeerkanba raacayo wixii iska caabin kala hor yimaada waxa uu isticmaalayaa awood dheeli tiran

**Farqada 5aad** waxaan soo jeedinayaa in sidan laga dhigo: ***"Guud ahaan Ciidanku shacbiga uma adeegsan karaan rasaas nool, marka laga reebo cid fal keeni kara dhimasho ama dhaawac halis ah kula kacaysa cid saddexaad ama xubnaha ciidanka, amaba kula kacaysa ciidankafal ay ciddaasi kagafuranayso hubkooda, falkaas oo dhicitaankiisu sugan yahay, deg-deg yahay, si kale oo lagu baajin karaana aanu markaa jirin.*** "waxa laga waramayaa waa duruufo

**Farqada 6aad** waxaan soo jeedinayaa in sidan laga dhigo ***"Marka ay timaado xaaladda ku xusan farqadan 5aad ee Qodobkan 16aad, hadii ay duruuftu u oggolaato, ciidanku wuxuu baajinta halista ku dayayaa Rasaas uu dulmarinayo cidda falka geysanaysa, haddii ay taasina wax ka tari weydo ama aan xilligeedii la joojin waxa u bannaan xubnaha ciidanka in ay ciddaas ka toogtaan meeshii kale ee jidhkiisa ka mid ah ee ula muuqata in ay ku baajin karaan halista ciddaasi geysaneyso." Secondment"***

**Farqada 7aad** waan **soo kordhiyay** waxaan soo jeedinayaa in sidan laga dhigo *"**Mabda'a guud ee ah in aanay xubnaha ciidanka Boolisku shacbiga u adeegsan rasaas nool waxa ka reeban;***

- ***b) Hadii la qabanayo qof fal-danbiyeed culus ku eedaysan ama xukuman oo ka baxsanaya gacan-ku-haynta Booliska;***
- ***t) Hadii la soo qabanayo qof fal-dembiyeed culus xukun-suge ugu ahaa xabsi, ama xukuman oo ka baxsaday xabsigii;***
- ***j) Hadii sifo sharciya ah loogu tagayo tegayo si loo baadho fal-danbiyeed culus oo looga shakisanyahay oo uu qofkaasi iska-caabn xooggan kala hor-yimaado ciidanka ama isku dayay in uu baxsado.***
- ***x) Mar kasta oo ay suurto-gal u tahay ciidanka waxaa laga maarmaan ah in ka hor intaan rasaasta toos loogaga toogan meel halis ah qofka ay isku dayayaan inay qabtaan ee ku xusan farqaddan 6aad ee qodobkan 16aad, waxay qaadayaan tallaabooyinka isku-dayga joojinta ah ee ku xusan farqadda 5aad ee qodobkan 16aad.***

**Farqaddii 5aad** ee soo jeedinta guddida waxay halka ku noqonaysaa farqadda 7aad, farqadaha ka danbeeyana halkaasbaa tirsigooda laga sii qaadayaa ilaa 12aad
**Waxaan ku soo kordhiyay Farqad 13aad**: ***"Marka la hubinayo in dhimasho qof shacbi ah ciidanka Boolisku u geysto ay xubinta ciidanka ah ee fal-kaasi ka dhacay dembi ku ahayd iyo in kale, baadhistu waa in ay tix-galisaa:***

- ***B. Qofka Dhintay hubka uu sitay iyo dhibta uu ku geysan kari lahaa;***
- ***T. Inta uu qofka dhintay u jiray cidda uu dhibka la maagganaa markaa ay rasaastu ku dhacday;***
- ***J. In ay xubinta Boolisku ay fursad u haysatay in qaaddo tallaabooyinka isku-deyga joojinta ee ku xusan farqada 5aad ee qodobkan 16aad, iyo***
- ***X. In xubinta ciidanka ahi, haddii ay fursadaa ay haysatay ay qaadday tallaabooyinka isku-deyga joojinta, ay qaadday iyo in kale."***

Hadii aynaan xeerarka sidaa ku qorin miyaynu hubnaa in baadhista sidaa u galayaan? Waa maya weeye. Anigu waxaan qabaa in ay laga maar-maantahay in xeerka loo qaliyo si loogu dhaqmo oo ay u noqoto wax la raaco. Qodobkaa 16aad ee guddida qaabakaa iyo korodh siimooyinkaa ayaan ku sameeyay.

**Qodobka 17aad Xil-gudashada Xubnaha Ciidanka Booliska,** farqadaha Qodobka waxaan ku sameeya korodhsiimo waxaanan ka dhigay sidan soo socota oo aan koradhsiimo iyo sixid aan ku sameeya.

1. Si loo ilaaliyo xil-gudashada ciidanka Booliska, xubin kasta oo ka tirsan ciidanku waa in ay leedahay kaadhka aqoonsiga ee ciidanka iyo dirayskii ciidanka oo uu ku muujisan yahay lanbar u gaar ah xubin kasta.
2. xubin kasta oo ciidanka booliska ahi, waxay w*aajibaadkeeda* u gudanaysaa si waafaqsan ***Dastuurka***, xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.
3. **Farqada 3aad Sideed ayaan u daayay.**
4. Awooda soo-saarista xeer-nidaamiye lagu faah-faahinayo tababarrada la siinayo ciidanka booliska oo guddidu ku talo bixisay in uu yeesho Taliyuhu xeerkuna uu meel ku cadeeyay in uu leeyahay wasiirku xeer-nidaamiye kasta waxaa leh wasiirka. Markaa halkaan awoodaa wasiirka ayaan ku celiyay.
5. Waajibaadyada shaqo ee xubin am xubnaha loo dirayaa waa in ay ahaadaan kuwo sharci ah, ila markaana ku salaysan ***Dastuurka,*** Xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya hawlaha ciidanka booliska.

**Qodobka 32aad Talobixinta Guddida Farqada 1aad** Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka booliska oo lagu soo eedeeyo fal-dembiyeed ciqaab ah waxa la hor-geynayaa maxkamadda awoodda u leh, hadii ay ku cadaatana maxkamadaynteeda waxa loo raacayaa xeerarka habka ciqaabta iyo xeerka ciqaabta guud.

***Waxaan soo jeedinayaa in loo badelay sidan: "Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka booliska oo lagu soo eedeeyo fal-dembiyeed ciqaab ah waxa la hor-geynayaa maxkamadda awoodda u leh, maxkamadaynteeda waxa loo raacayaa xeerarka habka ciqaabta iyo xeerka ciqaabta guud. Marka"***
**Farqada 2aad Sideed Ayaan u daayay,**

Farqadaasi waxay leedahay maxkamadii ciidanka ayaa la saarayaa, halkaana waxaa ku jira khalad Dastuuri ah oo dhawr iyo labaatankaa sanadood ee soomaliland jirtayba jiray **Qodobka 99aad** ee dastuurka wuxuu leeyahay oo **Dhismaha Maxkamadaha ka hadlayaa** wuxuu leeyahay "Hay'adaha Garsoorku waxay ka kooban yihiin maxkamadaha iyo Xeer-ilaalinta" waana waaxda sadexaad ee qaranka sidoo kale **Qodobka 100aad** ayaa waxa uu leeyahay **Maxkamadah** Maxamadaha Jamhuuriyadda Somaliland waxay ka kooban yihiin: "Maxamadda Sare; Maxamadaha Racfaanka ee Gobolladda; Maxamadaha Gobolada; Maxamadaha Degmooyinka; iyo Maxkamadaha Ciidamada Qaranka. Maxkamadaha ciidamadu waxay ka mid yihiin maxkamadeheena caadiga ah, waxaanay ka sii mid yihiin Waaxda Garsoorka imikana waxay hoos joogaan xukuumada iyo wasaarada Gaashaadhiga. markaa maxakamadd lagala cararay meesheedii oo ciidan la hoos geeyay oo xeer hoosaadkeeda iyo wexeediiba ciidan iyo milatari tahay oo mararka qaar koodna la yidhaa waxaa la sarayaa qof rayid ah, markaa ma dhibaato la'aanayso.

markaa ma odhan karno inta uu dastuurku sidaa yahaya ma odhan karno maxkamada caadiga ah ha la geeyo, oo xeerkiibaa ina leh maxkamadaha ciidan ka ayaa la gaynayaa, lakiin waxaan shirgudoonka kula talinayaa, sidaa Dastuurku wuu ku jabanyahaye

arinkaase sidii loo sixi lahaa in ay madaxweynaha iyo kala tashadaan oo sidii maxkamadaha ciidamada la hoos gayn lahaa maxkamadaha caadiga ahaa, sidii ay ahaan jirtay 69-kii ka hor ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 34aad ee soo jeedinta Guddida Dhismaha Xafiiska Daba galka iyo Cabashooyinka Dadweynaha.** Saddexdan Qodob ee soo socda horana waa looga hadlaye ee ah 34aad, 35aad iyo 36aad oo aan waliba anigu qaar kale aan ku daray oo aan sii balbalaadhiya waana arimaha ka hadlaya sidii booliska daba-gal loogu samayn lahaa, loogana xakamayn lahaa falalaka ka baxsan sharcigu inta uu u ogolaaday qodobadii ka hadlayay weeyi, waxaana xeerkeenii hore ku qornaa gudi la yidhaa gudi ka dhan ah cabashooyinka ciidanka booliska, waxaana lagu soo turjumay ereyo la yidhaa (Boolis complaints commission) oo ahaa ereyo laga soo qaatay dalalkan Reer galbeedka, Boolis complaints commission iyo sida ay tani u taalay si uu maanta caalamku uu ku dhaqmaba maaha, hada sidaa loo dhigay ee ay xeerka ugu jirtay ee ciidankii iyo wasaarada arrimaha guduhu qaadan waayeen marxalada maanta lagu dhaqmo maaha waana mid hore looga guuray.

Waxaanay ku koob naan jirta cabashooyinka soo gaadha in ay ka go'aan gaadhaan, oo ay baadhaan oo markii hore awood umay lahaan jirin in eedaymaha kale ee booliska ku yimaada ay baadhaan oo ay go'aan ka gaadhaan way ka xanibnaan jireen, qoraalka u yimaad uubay daba gali jireen oo hadii ay baadhis hoose ay u baahdaan ay u yeedhan jireen cidii ay khusaynaysay

Waa laga guuray taa oo Hada-se waxaa loo gudbay, qolaba Magac ayay ula baxdaaye, Ingiriiska oo kale waxa uu leeyahay xafiis la yidhaa independent Office for Boolis condect waana xafiis si active ah u shaqeeya waxaanu laamo ku leeyahay Degmo kasta, waxaa uu leeyahay ciidan gaar ah oo ilaalinaya hab-dhaqanadda xun kun ee booliska ka dhaca, waxaa kale oo uu baadhaya cida gacantooda ku dhimata, waxaanu baadhayaa sababta uu u dhintay qofkaasi.

Imika Gudi xakamaysan oo cabasho uun sugaysa ayaa soomaliland qaadan weyday oo ay soo celisay oo waxaa lagu soo beddelay 5-darajo mid heer qaran ah, mid talis guud ah, mid degmo ah iyo mid goobta ay ka dhacday ah oo dhamaantood wasaarada arimaha gudaha uun ah ayaa wasaaradii arimaha guduhu soo badeshay oo gudidii ka bacsanayd ciidanka iyo arimaha gudaha Meesha ayay kasaartay.

Guddidu halkaa way ku soo waabisay oo xeerkii hore ayay ku soo celisay in kastoo ay labadii qareen ka saartay, anigu waxaan qabaa in taa hore lagu soo celiyo ee ahayd gudi ka baxsan oo u xilsaaran cabashooyinka soo gaadhaya waan ku talinayaa wanan ku raacsanahay gudida iyo qolooyinkii iga horeeyay, waxaanse ku khilaafsanahay xeerkaa hore waxay farqadiisa labaad odhanaysaa gudiyada heer gobol iyo heer degmo wasiirka arimaha gudaha ayaa u magacaabi doona, gudiyo ka kooban booliska iyo deeganka oo xeer nidaamiye ku soo saaraya ayaa xeerku uu awood siinayaa, shaqdiina waxaa laga

dhigayaa jaran-jaro dheer oo afar gudi ah, gudi heer booliskaa loo dhisay Gudi gooni ah, gudi heer qaran ah, gudi heer gobol ah iyo gudi heer degmo ah intaas oo gudi ayaa is guud saaran oo marka oo marka qofka cabanayaa uu cabashada u dhiibo taliyaha ugu horeeya ee saldhiga haysta, ee uu kaasi ka degmada u geeyo ee ay ka go'aan gaadho ee uu ku qanci waayo oo uu uga cawdo ka gobolka, hadi uu taa ku qanci waayana wuxuu uu tagayaa gudida qaran ee ka sii saraysa ee heer qaran, markaa waa cadaalad raagtay oo sida uu sheegayo mabda'a sharci cadaalada kaa raagatay waa cadaalada kaa raagtay.

Markaa waxaan ku talinayaa in gudiyadaa is dulsaaran ee xaga booliska ah in ta talsika guud lagu soo reebo, oo mar ka qofka canayaa uu degmo ka soo cawdo oo taliyahaasi uu toos qaybta ugu soo diro gudidda taliyaha qaybtana uu ogaysiin uun soo siiyo, dabadeedna gudidu arinkaa eegto oo ay halkeeda ugu tagto oo wixii ka hooseeyay ay Meesha ka saarto oo ay mobile-noqoto wey soo gaabanaysaa.Tan kale ee cabashadana waa in sidaa laga dhigaa heer Qaran oo ay noqoto sida tii hore mid mobile ah intaa ayaan ku soo koobay labadii gudi.

Xeerku waxa uu qorayaa ama uu aasaasayaa dabagalka cabashooyinka dadweynaha (Inter control complaint Unit) kaasi oo laga furayo xarunta taliska guud **waxaanan ka saaray intii kale oo waxaan ku soo koobay laga furayo taliska guud waxaanan u qabtay saddex biloog gudahoos marka uu dhaqan galo xeerkani**, sidii xeerkii hore uu waajibiyay gudiyada ee hoosta la dhigay oo in mudo ahna uu iska yaalay hadana uu soo noqday, markaa hadii aan hada wakhti loo samayn saw sidii inta loo dhigo hadana inagu soo noqon maayo, markaa waxaan soo jeedinayaa in wakhti loo qabto.

**Farqada 4aad** Xafiidka Debagalka iyo cabashooyinka ee heer gobol iyo heer Degmo ***waxaan waxaan soo jeedinayaa in xeerka laga saaro.*** Jaranjaro dheer oo wakhti aan loo baahnayn qaadata ayaa ka abuurmaysa, "cadaalad kaa raagtay waa cadaalad laguu diiday" ayaa la yidhi.

**Farqada 5aad,** Guddida ku xusan farqada 3aad ee qodobkan waxay u dhigay sidan ***"waxay yeelanaysaa gudoomiye, oo xubinta ugu darajada serraysa noqonayso iyo xoghaye***. Waana gudii aan ka soo reebay gudiyadii ay soo jeediyeen"

**Farqada 6aad** Xafiiska ku xusan farqada 1aad ee qodobkan wuxuu cabashooyinka u baadhayaa ugana go'aan gaadhayaasi madax-bannaan. ***Waan toos toosiyay farqadan***
**Waxaan ku soo kordhiyay Qodobkan: Farqad 7aad,** ***"cabashooyinka soo gaadha taliyayaasha saldhigyada iyo qaybaha ee Gobollada iyo degmooyink, waxa Taliyayaasha Qaybuhu u soo gudbinayaan xafiiska dabagalka iyo cabashooyinka dadweynah, oo ku dhageysanaya Taliska guud, haddii iyo goorta loo baahdana xafiisku wuxuu cabashooyinka ku dhagaysanayaa gobolada iyo degmooyinka arrimaha laga cabanayaa ka dheceen."*** Waa marka aan lahaa mobile ha noqoto oo halkeeda ha ku dhagaysan karto halka hoosana ha ugu tagi karto.

**Qodobka 35[aad] ee** soo jeedinta Guddida ee awooda xafiiska daba galka iyo cabashooyinka dadweynaha farqadaha A iyo B sidoo ayaan ku daayay kaliya ***waxaan soo jeedinayaa in siiqad kaliya lagu qoro*** tusaale ahaa halka ah inuu ka go'aan gaadho cabashada loo soo gudbiyo una gudbiyo go'aangaadho, xafiiskana waa waa xafiiskii guud ee cabashooyinku imanayeen. Marka uu ka go'aan gaadho arintaa kiisa waxa uu u gudbinayaa taliyaha booliska si uu ugu sii gudbiyo taliyaha qaybta, sida uu xeerkaasi sheegay oo hadii guddidu u gudbiso waxaa mararka qaar iman doonta in ay dhaqan galintii ay ka yar midhaabaan, lakiin hadii uu taliyuhu u gudbiyo weyfulinayaan.

Markaa anigu halkaa waan is dhaafiyay oo waxaan idhi "***Go'aanka taliyaha ha u gudiyaan taliyaha qaybtana haday doonaan ogaysiin ha siiyaan oo ha ku horayso cida talaabada qaadaysa oo markaa taa amar ayaa la socda.***

Taliyayaasha qaybuhu waxay ku wargalinayaan taliyaha ciidanka booliska cabashooyinka soo gaadha, iyagama marka ay cabashooyin soo gaadhaan ee xafiiska baadhista ee taliska guud ay u gudbinayaan taliyihii ciidka ayay iyaguna ogaysiin siinayaan. **Markaa Waxan ku kordhiyay Farqad 3aad** oo odhanaysa ***"Hadii cidii cabasha soo gubisatay ku qanci weydo go'aanka xafiiska Dabagalka iyo cabashooyinka Dadweynaha muddo Saddex bilood ah, waxay cabashadeeda u gudbinaysaa Guddida Cabashooyinka ka dhanka ah ciidanka Booliska"***

**Qodobka 36[aad] Dhismaha** Cabashooyinka ka dhacka ah ciidanka booliska **waxaan u soo jeedinay in laga dhigo Qodobkan sidan soo socota: - "*waa qodob cusub*" waana** isku soo ururiyay oo halkii marna laga qorayay cida soo diraysa marna laga qorayay inata ay ka kooban yihiin la qorayay ayaan iskugu keenay xubo meelo laga soo magacaabo si uu xeerku u soo gaabto.

1. Guddida ka cabashooyinka ka dhanka ah ciidanka boolisku waxay ka koobantahay:
   a. Xubin ka tirsan guddida nabad-gelyada iyo Difaaca ee Golaha Guurtida oo uu soo magacaabo Gudoomiyaha Golaha Guurtidu oo ah gudoomiyha Guddida cabashooyinka ka dhanka ah ciidanka booliska.
   b. Xubin ka tirsan Guddida arrimaha gudaha ee Golaha Wakiillada oo uu soo magacaabo gudoomiyaha Golaha Wakiiladu.
   c. Xubin ka socota Wasaarada Arrimaha Gudaha oo uu soo magacaabo Wasiirka Arrimaha Guduhu Qabanaysana xilka xoghaynta Guddida Cabashooyinka ka dhanka ah ciidanka Booliska, codna aan lahayn balse arragtideeda ka dhiiban karta arrimaha laga hadlayo.
   d. Sarkaal ka tirsan ciidanka Booliska oo khabiir ah oo uu soo magacaabo Taliyaha ciidanka Boolisku.
   e. Qareen madax-bannaan oo aqoon u leh shuruucda dalka oo uu soo magacaabo Ururka qareenadu.
   f. Xubin ka tirsan Guddida Xuquuqal Insaanka Qaranka oo uu soo magacaabo Gudoomiyaha Guddida Xuquuqal Insaanku.

2. Guddida Cabashooyinka ka dhanka ah Ciidanka Booliska Mudo Xileed keeduna waa 3sano.
3. Xubnaha Guddida Cabashooyinka ka dhanka ah ciidanka Booliska eek u xusan farqada 1aad ee qodobkan, waxaa magacaabistooda lagu soo dhamays-tirayaa 3(saddex) bilood Gudahood ka dib marka uu xeerkani Dhaqan-galo.
4. Guddida Cabashooyinka ka dhanka ah Ciidanka Boolisku waxay xafiis ku yeelanaysaa Wasaarada Arrimaha Gudaha.

Waxaan soo jeedinayaa in sidii hore loo qaado awood Guddida Cabashooyinka ka dhanka ah ciidanka booliska oo lagu sameeyo uun is-beddaladaa kooban uun.

Farqada 5aad ee qodobka 36aad ee aan hada ka hadlaayay oo aan u raray farqada 4aad ayaa waxay ka hadlaysaa "***in ay go'aankooda guddidaa cabashookin ka dhanka ah ciidanka boolisku go'aan keeda in ay u gubinayso xeer ilaalinta guud ee caadiga sida maxkamadd ugu oogto xeer-ilaalinta guud ee caadiga ahi maxkamaddaha ciidaka waxba kama oogto dacwadahana waxaynu nidhi maxkamad ciidan ayay tagaysaa, xeer-ilaalin ciidan oo gaar ah ayay leeyihiin'*** hadaynaan soo celin oo maxkamaddaha caadiga ku soo darin xeer ilaalinta guud kuma laha wax wufuud ah maxkamada ciidank, markaa halkaa la yidhi xeer-ilaalinta guud ayay u celinaysaa. Xeer-ilaalinta ciidanka ayay u gudbinaysaa oo iyada ka oogi karta.

Markaa ilaa inta aan Dastuurka ku soo celinayno ee xeer-ilaalintii sidaa shaqadeeda ku gudato, halkaana waan saxay. Inahaa ayaan ka idhidhi waanay u furantahay Golaha wixii kor-kordhin iyo toos-toon ah ee wax la iskala qaadanayo, laakiin waxaan qabaa hadaynaan xeerkaa shiilin oo aynaan xeerkaa u kala samayn nidaam la maro oo ninka askariga ahi ogaan habka loo baadhayaa muxuu noqonayaa iyo habka aad maanta falka ka samaysay muxuu noqonayaa iyo qofka aad toogaytay muxuu hubsitay hadaanay maskaxda ugu jirin nin uu la col-yahay wuu tooganayaa nin uu hunguri ahna wuu ku dhufanayaa kii lagu soo qanjiidhiyayna wuu ku dhufanayaa oo aaminba yeelan maayo booliskeenu, markaa waxaan leeyahay arinkaa aad ha looga fiirsado, waxyaabahaa aan soo jeediyayna laga maar-maan ayaan u arkaa golayaashuna aad ha uga fiirsadaadn wasaalamu calaykun (***Secondment***).

# <u>Kal-fadhigii 38aad Fadhigii 15aad</u>

## <u>25 November 2018</u>

**Fadhigu Wuxuu furmay 9:48 AM**

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajendaha Fadhiga: -** Doodda Wax-ka- Beddelka iyo kaabista Xeerka Booliska Maalintii 2aad

**Gudoomiye Baashe Maxamed: -** Waxaa inoo socotay dooddii Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Booliska waxaan ku soo dhawaynayaa Xildhibaan Maxamed Xuseen X. Ciise.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-gudoonka Golaga iyo mudanayashaba Saxaafada, iyo Shaqaalahaba waan salaamayaa, Mudane Gudoomiye xeerka ina horyaala waa xeer uu Goluhu u ansixiyay tacab bandanna galiyay ayuu ahaa nuruntii, wax-ka-beddelkan cusub ee hada lagu soo sameeyay laba Qodob mooyaane inta kale waa wax la qaadan karo, waxaanu u qaybsanyahay laba qaybood qaytii xukuumada iyo qaybtii ay Guddidu wax-ka-beddelka ku soo samaysay, markaa guud ahaan waxaan taageersanahay oo aan raacsanahay tii guddida soo samaysay marka laga reebo Qodobka 16aad oo aan anigu ka qabo su'aal ama Concern-mooyaane. Ta xukuumadu soo jeedisay wixii ka horeeya 16aad iyaduna wax ceeb ah malaha waana waxla qaadan karo waayo si guud mar ah ayay u soo sameeyeen waanan taageerayaa, waayo waa faah-faahin iyo qurxin, ***markaa waxaan soo jeedinayaa in kuwaana lagu raaco.***

Mush-kiladu waxay ka taagan tahay waa laba qodob oo muhiim ah qodob 34aad iyo 36aad nuxur ahaan wax-ka-beddel ayay ku sameeyeen, xidhibaanadii shalay ka hadlayna waan ku taageersanahay soo jeedimahoogii, Cabdiraxmaan Dheere, Xuseen Axmed-ba oo si fiican u soo jeediyay talooyinkoodii. Mushkiladu waxaa weeyi mudane Gudoomiye Somaliland waxay doonaysaa in ay noqoto wadan dimuquraadi ah oo sharcigu sareeyo oo cid kasta oo Somaliland ahina ay sharciga ilaaliyaan oo dastuurkana la ilaaliyo, dad iyo dal noocaas ah ayaynu doonaynaa in aan noqono, mar hadii ay sidaa tahay waxaan u baahanay in xeerarka aan samaynaynaa in ay noqdaan kuwo ilaalinaya xuquuqda dadka Somaliland guud ahaanba.

Xeerkii hore ee aynu inagu ansixinay ee booliska iyo xeerkii ka ii horeeyay ee la yidhaa xeerka anshaxa iyo nabad gaelyada guud labdaa xeer meelo ayay iskaga dhawyihiin sida

mudaharaadada iyo sida loo kala kaxaynayo oo ahaa xeer lr. 51 oo si fiican u sheegaya waxyaabahaasi, ciidanka boolisku markasta oo ay talaabo qaadayaan waxay la tashanayaan guddida nabad galyada oo inta ay fadhiistaan amarka siinaya oo iyaga ayay ka dabqaadanayaan, oo Matalan hadii ay is yidhaahdaan boolisku awoodiina ayay ka baxsantahay waxa kaabaya oo taageeraya xeerkaa ayaa sheegaya oo wuxuu leeyahay ciidanka mila tarigu wuu taageeri karaa ciidanka booliska hadii loo baahdo iyaga oo u shaqaynaya sida ciidanka booliska oo kale.

Markaa xeerku waa in uu ilaaliyaa shaqadii booliska iyaguna waa in ay ilaaliyaan sharciga iyo shacabkaba. Markaa xeerka qodobbka 16aad waxaynu raacinay farqad odhanaysa ciidanka amaanku ama boolisku uma adeedsan karaan shacab aan hubaysnay rasaas wax-ka-beddelka hada la keenayna waxaa uu rabaa in uu ka daba wareego qodobkaa. Sida uu cadaynayo xeerkaa nabad-galyada guud ayaa cadaynaya in aanay adeegsan karin, markaa waxaa ku taageersanahay Xildhibaanadii iga horeeyay ee ay ka midka ahaayeen Cabdiraxmaan Dheere iyo Xuseen Axmed Caydiid, waxaan soo jeedinayaa in qodobka 16aad farqadiisa 7aad Xeerka aan laga saarin laakiin la sababeeyo xiliga ay isticmaali karaan.

**Markaa Waxaan leeyahay farqada 7$^{aad}$ waxaana soo jeedinayaa in** sideedii ay ahayd ee "**Boolisku rasaas nool Uma adeegsan karaa dad shacab ah oo aan hubaysnayn",** waxaana raaaciyay marka laga reebo xaaladahan Soo soda: -

- ***B) Haddii hub laga la horyimaaddo;***
- ***T) Haddii ay ciidanku qabanayaan maxbuus baxsaday oo ku xukunnaa dembi culus sida argagixiso, DiL IWM;***
- ***J) Haddii ay Kala kaxaynayaan ama kala dhex gelayaan kooxo ama beelo shacab ah oo hub is kala hor yimi;***
- ***X) Haddii ay Soo qabanayaan eedaysanayaal Ammaanka halis ku ah sida, argagixiso, budhcad hubaysan iwm;***
- ***KH) Haddii ay dhacdo inay Boolisku adeegsadaan rasaas nool, iyada oo aanay jirin xaaladahan ku xusan xubinta "b" ee farqaddan 7aad, waxaa masuuliyadda qaadaysa cidda amarka bixisay.***

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiye: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim shirgudoonka iyo xidhibaanada sharafta lehba waxaan idinku salaamayaa Bacda salaam, Xeerkan na horyaalaa waa xeer muhiima, sida xildhibaanadu uga qayb galeen baa laga garanayaa waajibaadkeenana si fiican baan uga gudanaynaa doodeenuna waa inoo soconataa. Anigu waxaan ku bilaabayaa xukuumadu kaabis iyo wax ka bedel xeerka booliska ah ayay keentay, runtii si fiican bayna u soo dhigtay una sabaybaysay waxyaabaha ay

kaabista iyo wax-ka-beddelka ku samaynayso. Guddiguna wuxuu soo qabtay oo culayska uu saaray uunbaan isleeyahay meelihii ugu muhiimsanaa **Qodobka 16aad 34aad iyo 35aad**, taasi macneheedu waxaan is idhi waxaa lagu raacay kaabistii iyo wax ka badalkii ay soo samaysay xukuumadu waayo imika tusaale ahaan **Qodobka 7aad iyo 8aad** kaabistii xukuumada ka timid waa la isku daray waxayna noqotay **qodobka 6aad** yacnihii xitaa qodob ahaan labadii qodob bay qodob ka dhigeen, yacnii xitaa tirade bogaga waa is badalayaan fiiro gaara in loo yeesho weeye.

Wax kabadalka iyo kaabistuna intii ka horaysay **Qodobka 16aad** wuu jiraa qodobo cusub oo ay ksuoo dareena oo uu ka mid yahay xilka uu leeyahay labada Taliye ku xigeen ayaan ku jirin xeerkii hore. Anuu waxaan isleeyahay taan si wanaagsan bay usoo dhigeen waanan waafaqsanahay wixii isbadal ah ee xukuumadu kusoo dartay, markaa hadii guddidu uu sidaa u dhigayna waan ku raacsanahay markaa hadii kalena tawdiix ama sharax kale ayuu u baahan yahay, ilaa la gaadhayo qodobka 16aad na sidaas bay isbadal iyo kaabis ugu soo sameeyeen, mana xuma ayaan qabaa anuu arin farsamo iyo habayn bayna u sameeyeen laakiin anuu markaa waxba kama badalna waxaanan ku raacsanahay siday u sameeyeen qodobada ka horeeya qodobka 16aad.

**Qodobka 16aad** buu guddidu is dul taagay, runtii waa qodobka ugu muhiimsan waxyaabo fara badan baana meesha ka muuqda. Marka ugu horaysa qodobka 1aad waa sax qodobka 2aad muhmal baa ku jira oo wuxuu leeyahay xubnaha ciidanka boolisku waxay qaadan karaan hub marka ay fulinayaan hawlo shaqadooda la xidhiidha. Runtii waa muhmal hawlo shaqadooda la xidhiidha marka la leeyahay marka la eego xeerna wuxuu ku haboon yahay in la sheego hawlahaa uu hubka u qaadanayo. ***Markaa waxaan anigu soo jeedinayaa in lagu xadido meelaha iyo goobaha shaqooyinka ee uu hubka u qaadanayo, isagoo suuqa socda iyo isagoon shaqo hayn maaha inuu hub qaato, sidaa darteed waa inay cadayn ay jirtaa hubkaas xiliga la qaadanayo***. Waxaa jira mid joogta ah oo ay hubkaa u qaadanayanaan sida ilaalinta xarumaha booliska iyo dawlada iyo goobaha kale ee ay u xil saaran yihiin, waxaa jira ilaalinta shaqsiyaadka muhiimka ah, waxaa jira safarada iyo dhaqdhaqaaqyada waxyaabo waxaa jira specific ah oo in la tilmaamo ayaa muhiima qodobkaasi wuu u u baahan yahay.

Xeerka wax kabadalka iyo kaabista waxaa ku jira oo gudiguna ku raacay runtii taas oo **Qodobka 7aad** markay isbadalka ay ku sameeyeen Guddidu wey ka tageen oo sidii ay xukuumadu u soo dhigtay ayay u qaateen, markaa anigu waxaan u arkaa sidii xildhibaanadii iga horeeyey soo sheegeen, ciidanka boolisku Xabad nool uma adeegsan karaan dad rayid ah oon hubaysnayn aad buu muhiim u yahay, hadii ay dhacdana waxaa ka masuul ah cidii amarkaa bixisay, waayo si kastoo shacabku u soo baxaan waxaa loo baahan yahay in la adeegsado qaanuunkii iyo xeerkii nabadgalyada ee xadidayay ee lagu kala dirayay dadkaa shicibka ah een hubaysnayn oo ah hubka cinjirka ah oo la isticmaalo iyo budhadhka caaga ah iyo biyaha waxaa raacaya wixii xeerka nabad galyadu u

baneeyey eek 8u suntanaa. Markaa qodobkaa marnaba in laga tago maaha waa nuxurkii xeerka, waxaynu u joognaana waa in shacabka iyo Booliska ay noqdaan dad is jecel, is jeclaysiguna wuxuu ka imanayaa in la ixtiraamo xuquuqda bini aadamka inaanu isagoon hubaysnayn aanu u isticmaalin hub nool taas waxaan ku raacsanahay sidii xildhibaanadii hore.

Waxaa Jira **Qodobka 16aad Farqadiisa 5aad** wuxuu leeyahay iyadana oo ku jirta xubanaha ciidanku markasta oo ay fulinayaan xeerarka dalka waa inay ilaaliyaan xuquuqda qofka, xuquuqda qofku waa karaamadiisa runtii iyaduna waxay u baahan tahay in la tilmaamo. Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro oo la tilmaamo sida uu sheegay Xubinta 3aad ee Dastuurka oo ay ka kooban yihiin Qodabada 21aad illaa 36aad intaas waxaa ku taxan xuquuqda uu leeyahay qofku, sidaa darteed waa in loo xadidaa qofka booliska ah marka ay hawl fulinayaan, anshaxa laftiisa iyo anshax dhaqameedka suuban waa kalmad iyaduna u baahan sharax sidaa darteed waa in lagu daraa wixii cadaynayay sida jidh dilka, aflagaadaynta iyo hanjabaada, waxaas weeye anshaxa khaladka ah ee dadka loo gaysto, markaa waa in la xadidaa wuxuu yahay anshaxa suuban ee ay boolisku ku dhaqmayaan.

**Waxaan isleeyahay waa lagama maarmaan ah qodobadaa aan sheegnay ee Qodobka** 7aad sidii guddidu ay hore ugu dhigeen oo xeerkana ugu jiray loogu soo celiyo. Taasina waa **Qodobka 16aad** sidii loo dhigay waxaa ka maqan soo jeedinta xukuumada **farqada 7aad** lagama tagi karo waa nuxurka muhiimka ah ee loo baahan yahay inay boolisku ku dhaqmaan.

Waxaa jira **Qodobka 10aad** waxay ka tageen iyagoo tix raacaya soo jeedinta xukuumada kii hore waajib ah yacnii wuxuu yidhi si xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka waafaqsan hadii dadweynaha khasaare naf iyo maalba leh marka baadhista la sugo waxaa loo gudbinayaa wasaarada arimaha gudaha si loo siiyo magdhow ku haboon waxaa ku qoran xeerka waxaa waajib ah baa ku qoran xeerka markaa waa in lagu daraa eraygaa waajib waayo waajibku malaha marka la baadhi in la geeyo iyo inkale.

**Qodobka 17aad** waxaa laga dhigay 5 farqadood, waxaan taabanayaa farqada 3aad xubanaha ciidanka waa in loogu hadal ama qoraal, xeerka ciidankana waxaa ku jiray hadal qoraal markaa waxaan isleeyahay labada eray marka la isku daro macneheedu waa hadalkii iyo qoraalkii oo is raacsan marka ama la idhaana hadalkiina waa gaar qoraalkiina waa gaar labadaba wuu istiqdaadi karaa laakiin hadal qoraal marka la idhaa waa hadalkii iyo qoraalkii oo wada socda, markaa anigu waxaan leeyahay oon soo jeedinayaa sidii hore halagu soo caliyo oo hadal qoraalka lagu daayo waliba la cadeeyo marka la adeegsanayo rasaas nool. Marka rasaas nool la idhi waajib in qofkii aan la odhan sidaas yeel waa inay jirtaa amar la bixiyay oo markaa ay askartu amarkaa ku camal falaysaa, sidaas buuna ku nabad galaysaa masuuliyada uu qaadayaa sarkaalka amray. Markaa in farqada lagu daraa hawlgalada la adeegsan karo rasaas nool.

**Qodobka 18aad iyo 19aad** waxaan u malaynayaa wax dooda kama jiraan xaga guddida dhinaca kalena waa ku sax san yihiin. Darajada ciidankana waxaa lagu sameeyey iyadana dib u habayn oo waxay u dhigeen si waafaqsan xeerka iyo dastuurka. Qodobkii 22aad isaga sidiisii bay u daayeen uu xeerka ugu qornaa qodobka 23, 24 sidoo kale lama badalin, qodobkan 25aad farqadiisa 4aad daryeelka iyo xanaanaynta naafada ciidanka waxaa ka masuula xukuumada, xukuumadu waxay ka kooban tahay wasaarado faro badan inta badan wasaarada Booliska qaabilsan waa wasaarada arimaha gudaha sidaa darteed in lagu muujiyo wasaarada baa ka fiican in guud ahaan xukuumada uun la saaro, khaladkaa madbaciga ahna laga saaro qodobkaa laftigiisana dawlada bay idhaahdeen maahana dawalada ee waa xukuumada.

Waxaan soo jeedinyaa xeerkan ciidanka booliska waxaa jira qodobka 123 iyo 124 oo ah xeerka ciidanka asluubta iyo milataryga labadaasba xeerarkoodii ilaa hada lama samayn dastuurkuna wuxuu jidaynayaa, kuwaas waxaan isleeyahay munaasibadan aan uga faaidaysano si aan u nidhaa si deg deg ah haloo soo gudbiyo labadaa xeer golaha wakiiladuna uga guto waajibkiisa dastuuriga ahaa inagaa ayaan ku soo gabogabaynayaa.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-gudoonka iyo xildhibaanadaba sharafta leh iyo bahda-saxaafada intaba waan salaamayaa, Waxaan ku gudo jirnaa xeerka Booliska, booliskuna wuxuu yahay dastuurkaa qaranka ee aynu halkaa ku hayno iyo shuruucda ka fasirantaba marka meel lagaga dhacay ay tahay ama inan la kufsaday ay tahay ama tuug alaab xaday ay tahay iyo haday mid wax dilay tahayba booliskaynu u diranahay, hub baynu u dhiibnay dadka intiisa kale ma hubaysna, Hubkii baynu doonaynaa inaanu siduu doono u isticmaaline si uu qaranku doonayo oo nabad galyo ku jirto u isticmaalo, waxaa aynu ka sheekaynayno xabadi markay booliska ka dhacdo ma xasuusna xeerka. Inaguse wixii waajibkeena ah uunbaynu ka gudanaynaa, ilaahayna waxaynu ka baryaynaa inuu noqdo mid hir gala oo wanaagsan laakiin waxaan ku raacsanahay xildhibaanadii hore xabad meel kasta haku jirto xabad nool looma adeegsan karo dad aan hubaysnayn laakiin maxay noqonaysaa tuuga la baxsaday waxay ku xidhan tahay ninkaa xabada haysta, inagu ku edeb daro ku dhiiri gallin kari mayno hadana odhan kari mayno dambiile baxsanaya maxaad xabada ugu riday.

Golaha sharci baa ka baxay ansaxay aad looga dooday, dabadeed xukuumadii markii sharcigii hir galay waxbay kasoo badashay. Anigu waxaan isku eegay xeerkii inaga baxay iyo isbadalka ay xukuumadu kusoo samaysay, inta badana toodaan raacay anigu, waxaanan shirgudoonka sharafta leh usoo jeedinayaa inaynu legaly advisory board samaysanyo oo budget yar meel ugu darno oo ay inoo soo hawl yareeyaan kalmad yar oo qudha ayuu si u macnaysanayaa ninnka looyarka ahi waxaynu ka hadlaynaana law makers baynu nahay in aynu barigii hore way jireene in aynu samaysano unit sagaala guddi markay soo eeg eegaan waxay samaynayaan in loo dhiibo oo ka eega xaga qaynuunka iyo dastuurka, waanay inaga cilmi badan yihiin.

Waxaan aad ugu raacsanahay xuseen axmed caydiid oo khudbadii shalay gabigiisiiba wada qaatay wax alaala wixii korodhsiimmo ahaa ee uu soo jeediyay iyo isbadalba ahaa waan ku taageeray, obsiiye qodobaduu ka hadlay waan ku taageeray.

Anigu labadooda uunbaan isku eegay waanan dhex galayaa qodobada 1 ilaa 8 waxba kama badaline sidii uu golaha kaga baxay baan ku taageeray.

**Qodobka 9aad** waa astaanta booliiska sidii goluhu ansixiyay baan taageeray anigu. **Qodobka 10aad** waa xuduudka hawl fulineed ee ciidanka, siday xukuumadu usoo badashay ee ay ka dhigtay baan taageeray. **Qodobka 12aad** oo noqonaya ka **11aad** xukuumadu siday usoo badashay baan taageeray, halkaa wasaarada arimaha guduhu waxay u xil saaran tahay maaha waxay u qaabilsan tahay halaga badalo oo halaga dhigo waxay u xil saaran tahay boolisku wasaaraduu hoos imaadaa ee waxay u qaabilsan tahay maaha ee waxay u xil saaran tahay weeye.

**Qodobka 13aad** waa awooda iyo masuuliyada ciidanka booliska isbadalkii xukuumada waan taageeray laakiin waxay ka saaree shuruudihii aynu ku xidhnay kartidiisa aqoontiisa jaamacadeed iyo aqoonta dheer ee uu leeyahay, waxaanan ku taageer sanahay sidii uu Xuseen Axmed Caydiid u dhigay. Isbadalkaa waan taageersanahay **laakiin shuruudii aynu ku xidhnay yaan laga tagin halagu daro.**

**Qodobka 14aad** awooda iyo masuuliyada taliye ku xigeenka weeye sidii xukuumadu usoo badashaan ku raacay. **Qodobka 16aad** oo ah awoda ciidanka booliska isbadankaan taageeray. **Qodobka 17aad** xil gudashada xubnaha ciidanka booliiska isbadalkaan taageeray xukuumada ka imid qodobka 18aad shaqo joojinta isbadalkaan raacay xukuumada qodobka 19aad dhamaadka shaqada xubnaha isbadalkaa taageeray iyo sidii uu usoo jeediyay iyo wuxuu ku daray xildhibaan xuseen axmed caydiid.

**Qodobka 21aad** darajada ciidanka waxaan taageeray siday usoo jeediyeen

**Qodobka 23aad** ee mushaharka iyo gunooyinka sidii xukuumada usoo jeedisay ayaan raacay.

**Qodobka 24aad** abaal marinta xubnaha ciidanka sidii loo soo badalay baan taageeray.

**Qodobka 25aad** ee dhamaadka shaqada iyo marka ay qof wax ku dhacaan ama uu dhinto, qodobkaa woxoogaa baan ku daray, hadii askarigu dhinto ama dhaawac aanu ka kacayn soo gaadho caruurtiisii ilaa ay 18 jir gaadhayaan yaa ka war haynaya? Dawladu haka war hayso waxaa waajib ku ah inay caafimaadkooda iyo waxbarashadoodaba siiso midhkaana waan soo jeedinayaa waa in xukuumadu daryeeshaa. Qodobka 26aad hawl galinta ciidanka sidii ay usoo badaleen baan taageeray iyo soo jeedintii xildhibaan xuseen axmed caydiid. Qodobka 27aad qiimaynta xubnaa ciidanka sidii ay kusoo badaleen baan taageeray qodobka 29aad farqadiisa 2aad way soo dareen waan taageeray. Qodobka 30aad waxyaabaha ka reeban xubnaha oo farqad cusuba sidii ay usoo qoreen baan

taageeray. Qodobka 31aad talaabooyinka anshax marinta waa qodob cusub kaana waan ku taageeray siday usoo jeediyeen. Qodobka 32aad anshax marinta dambiyada sidii ay usoo qoreen baan ku taageeray.

Waxaanse wax ka badalay qodobka 33aad 34aad iyo 35aad iyo 36aad oo ah ciidamada boolisku marka ay wax gaystaan halka looga cabanayo sidii aynu ku ansixinay uu golaha kaga baxay xeerkeenii iyo gudidii civilianka ahayd ee ka garnaqaysay oo meel walba tagi karta 3 dii bilood sidii loo qaato laakiin booliis laga cabanayaa booliis ka garnaqayaa taana waan diiday. Qodobka 44aad sidii loosoo badalay baan taageeray. Wasalaama calaykum

**Md. Maxamed Cismaan Maxamed (Bulqaas): -** Bacda salaan, Waxaan rabaa inaan soo koobo dhowr qodob oo yaryar oo booliiska arimihiisa ku saabsan, runtii xeerkana aadbuu muhiim u yahay in wax laga badalo waxna lagu daro xildhibaanadu xaq bay u leeyihiin.

**Qodobka 14aad** hore ugumay jirin xeerkii hore waan taageerayaa in lagu soo daro awooda iyo masuuliyada taliye ku xigeenada.

**Qodobka 16aad** awoodaha ciidanka booliska farqada 7aad waa inaan laga saarin oo ay sidoodii hore ahaataa, taasoo ah ciidanku xabad nool uma adeegsan karo dadka aan hubaysnayn. Waxaanan ku darayaa farqada 11aad oo muhiim aan u arkay taas oo ah **ciidanka booliisku marka ay iska hor imaadaan dad aan hubaysnayn qiiqa dadka ka ilmaysiiya iyo rasaasta rabadhka ah ee booliiska caalamku isticmaalaan si loo ilaaliyo nabad galyada nafaha dadka.**

**Qodobada 34aad 35aad iyo 36aad** oo sheegaya cabashada ka dhanka ah ciidanka booliiska ah iyo magacaabista guddida cabooshooyinka ka dhanka ah xubnaha ciidanka booliiska ah dhamaan 3daa waxaan u daynayaa inay sidoo dii hore ahaadaan oon waxba laga badalin ee aynu ansixinay.

**Qodobka 17aad** xilgudashada xubnaha booliska waxaan ku darayaa farqada 6aad oo odhanaysa ***xubnaha booliska ah waa in la baraa sharciga booliisku ku dhaqmo iyo dastuurka qaranka, sidoo kale waa in la baraa xasaanada xildhibaanadu leeyihiin.***

Waxaad arkaysaa xubintii booliiska ahayd iyo xildhibaankii oo is haysta oo uu leeyahay gali maysid xafiiskee naga joog waxba nagama galin xildhibaanimadaadee adigoao hawl shaqo kale xafiisyad waana in talaabo sharci laga qaadaa ciidanka nabad galyada wadoyinka waxaad arkaysaa askarigii oo xildhibaankii ku leh mari maysid wadade ka noqo wadadii uu ka shaqo tagayay oo kasoo wareeg meel aan munaasib ahayn oo fog. Wabilaahi tawfiiq.

**Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe): -** Shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa, Runtii Guddida arimaha gudaha ee kasoo shaqaysay aad iyo aadbaan ugu

mahad calinayaa. Runtii xeerkan sidii ragii iga horeeyeyba sheegeen waa xeer muhiima wuxuu muhiim u yahay sababtoo ah hawlaha u waaweyn ee ay dawladu qabato law and order samayso weeye, markaa hawsha dawlada aan u dooranaa ee aynu u igmanaa waa in qofka amnigiisa iyo xoolihiisa iyo naftiisa inay ilaaliso, runtii anigu halkaa waxaanu arkaa in uu xeerkani yahay xeerka Dawladnimadu ka bilaabanto. Markaa anigu mihiimad weyn ayaan siinayaa.

Markaa hadii aynu eegno xaalada uu maanta Boolisku ku jiro waxaa ku xeerarn xaalado aad u adag, oo saacado badan ayay shaqeeyaan, habeeno badan ayay soo jeedaan, mushaharooyin ku filan ma qaataanm markaa duruufahaa ku xeeran waa in uu noqdaa xeerkani mid wax ka baddelaya oo hagaajinaya korna u qaaday cidanka booliska waa in uu uu noqdaa ula jeedada aan kaleenahayna waa in amniga iyo degaanasha dadlka uu ka qayb qaato weeye, markan yar eeg eegay waxaan is idhi qabyo badan baa xeerkan ku jirta, waxyaabo badan oo muhima ayaa ka maqan, waxyaaabaha aan dareemay waxaa ka mida qofka booliiska ah waa kuma waa kee? Qofka booliiska ahi waa qof tababar caynkaasaa ***qaba in la dhaariyo*** ayaan ku dari lahaa qofka booliska laga dhigayo taasaan ku dari lahaa anigu. Waxaan is idhi waxaa kaloo ka maqan inay booliisku qofka dili karaan iyo inkale. Waxaan kaloon is idhi way ka maqan tahay meelaha dadka lagu xidhayaa waa halkee meel walba qofka miyaa lagu xidhi karaa.

Waxyaabaha aan is idhi way ka maqan tahay ee kale waxaa ka mida qaybiyhii booliisku ay lahaayeen ***CID-da oo kale kuma taalo cida xukumaysa iyo halkay hoos tagayso.*** Waxaan kaloon guddida uga mahad calinayaa inay soo galiyaan in ***oversite*** in booliiska eegta. Waxaa ka maqan xidhiidhkii booliiska iyo dadweynaha ayaa ka maqan oo runtii asal u ah. Waxaan kaloon ku dari lahaa in ninka taliyaha ah iyo ninka ku xiga uu baarlamaanku ansixiyaa sida madax da kale

***Waxaan ku gababaynayaa xeerkani qabyo faro badan buu leeyahay hadii aynu doonayno inaynu dawladnimo samayno dadkii xirfadan shaqada u lahaa aynu kala tashano haynaga caawiyeen xeerkii oo dhana aynu dib ugu noqono***.

# Kal-fadhigii 38aad Fadhigii 16aad

## 26 November 2018

**Fadhigu Wuxuu furmay 9:41 AM**

Gudoomiye Axmed-yaasiin Sh. Cali Ayaanle

**Ajendaha Fadhiga: -** Doodda Wax-ka-beddelka Xeerka Booliska Maalintii 3aad

**Gudoomiye Axmed-yaasiin Sh. Cali: -** Waxaa inoo socotay dooddii Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Booliska waxaynu halkii ka sii qaadaynaa dooda waxaanan ku soo dhowaynayaa si uu dooda uga qayb qaato Xildhibaan Bashiir sh. XuseenTukaale.

**Md. Bashiir Xuseen Tukaale: -** Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal Dhamaantiin waad salaaman tihiin, Anigu qodobo dhowr ah baan is dultaagay.

**Qodobka 7aad** oo ah laba farqadood oo kala ah **A iyo B** waxaanu ku soo darayaa Farqada **C** taas oo noqonaysa sidan **"Difaaca Qaranka Marka loo baahdo hadii loo baahdo"**

**Qodobka 10aad** laba jeer buu Xeerka ku qoran yahay, marna 10aad marna waa 11aad oo tobnaadkaa sareeya wuxuuna ka hadlayaa awoodda Madaxweynaha markaa mid ha la qaato, Marka **Qodobkan Farqadiisa 3aad** anigu Waxaan soo jeedinayaa in meesha laga saaro farqadaas oo *odhanaysa "Waxa kale oo uu Madaxweynuhu ku leeyahay Ciidanka Booliiska Somaliland"* marka taasna ha laga saaro, kalmada Booliisna ha laga dhigo **"Bileys"**

**Isla Qodobkaas Farqada 6aad** *"wuxuu Ciidanka Booliiska ku hogaamiyaa Siyaasadda Xukuumada"*, marka ma odhan karno Siyaasada Xukuumada ee waa Siyaasada Wasaarada Arrimaha Gudaha oo uu hoos yimaada, markaa farqadaas waxaan ku badali **lahaa "siyaasadda Wasaarada Arrimaha Gudaha"**.

**Sixitaan,** Bayjajka 12, 13 iyo 14 way is dhaafsan yihiine ha la isku hagaajiyo.

**Qodobka 11aad** waxaan ku dari lahaa Farqada Cusub oo ah **Farqada 11aad** taas oo dhanaysa ***"Awoodda Magacaabista hogaamada iyo taliye qaybeedyada Booliska laga tashado Wasiirka Arrimaha Gudaha".*** Markaa anigu doodayda intaasaan ku soo gabagabaynayaa, waana mahadsan tihiin.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne):-** Gudoomiye saddex Qodob baan anigu Isdul taagayaa, mid waa **Guddidda Cabashada** ee loo samaynayo Muwaadiniinta Cabashadooda dhagaystaan, markaa taas waxaan Xildhibaan Xuseen Caydiid ku raacsanahay in aynu processka soo yarayno, hadii aynu ka soo bilawno Tuullo ilaa Degmo illaa Gobol iyo Xarunta waa process dheer oo hadii uu dhaawac yahay wuuba ku

dhimanayaa, Ujeeddada aynu ka leenahayna waxa weeye sida Xeerarkaba waa inaynu is waafajino xaqa muwaadinka iyo xaqa cidda Nabadgalyada ilaalinaysa leeyihiin.

Markaa anigu taas waxaan soo jeedinayaa processkaas dheer shaqayn maayo oo ninka dee tuullo cidlo ah joogo ama Degmo joogaba dhibaatada Booliisku u gaysto intay halkan soo gaadhaysaa waa dhiibo dheer, waana waxyaabaha Maxkamadaha inaga haysta oo waxaad arkaysaa qof ka imanaya ilaa Xiis iyo Maydh ama ka imanaya Saylac iyo Lughaya iyadoo Goboladii leeyihiin Maxkamadihii oo dhan ilaa tii Rafcaanka hadana wax ka qaban waayaan oo qofkii oo daalan illaa Hargaysa imanayo waana mushaakilka ina haysta. Inkasto aan ugu mahad celinayo Gudoomiyaha Maxkamada Sare oo intuu Maxkamadiiba qaatay la tagay Gobolada waxaana u arkaa positive side, hadana wadanku dee Hargaysa maaha oo inaynu nidhaahno saddex Waaxoodba Hargeysa fadhiyayaan oo laga xukumayaa waxay ila tahay in aanay fair ahayn oo qof waliba halkuu joogo ku helo cadaalad.

Markaa Xildhibaanada badan koodu waxay isku raacsan yihiin in la helo Gudiddaas cabashooyinka, laakiin anigu waxaan ku talin lahaa halkii laga samayn lahaa Gudi Cusub waxaan soo jeedin lahaa ra'yi curad ah kaas oo ah waxaa jirta Gudi Nabadgaylo oo lixda Gobolba ka jirta, ***Markaa Gudiddaas Nabadgalyada in iyaga loo xilsaaro in ay Cabashada Booliska ee muwaadinku ka cabanayo soo mariyaan***, inkasto ay iyana Xukuumada u shaqeeyaan, hadana waxaynu ku dari karta mid kasta nin ama laba nin oo looyariin sharciga fahmaya, markaa taas ayaan soo jeedinayaa oo Gudidda Nabagalyada ee Goboladu noqdaan kuwa muwaadinka Booliska ka cabanayaa ula tagayaan cabashadoodda.

Arrinta labaad, waa **Xabada Nool ee la adeegsanayo**, waa arrin aad iyo aad u xasaasiya, meesha waxa jira waa laba arrimood, Bileysku dee Nabadgayadeenuu illaaliyaa Illaahay baa Nabada hayee markaa taasaynu u xilsaarnaye inay ina laayaan umaynu xilsaaran, mar hadii iyagu u xilsaaran yihiin inay dadka iyo maalkiisaba illaaliyaan waxaa haboon in wixii iyagana illaalinaya la helaan oo sharci illaaliya helaan weeye, Xeerkani way ugu jirta runtii wax illaaliya, laakiin marka kun qof oo dhagax tuuraya, shacabku markay dhowr boqol yihiin oo intaas dhagax tuurayaan oo labaatan nin Boolis ah ku tuurayaan, waa arjimaad baan qabaa ee nolol ay kala baxayaan ma jiraan.

Markaa kow waxaan ku talinayaa inagoo laba geesoodba xaqooda ilaalinaya waa in la raadiyo oo Boolisku Miisaaniyada ku darsadaan, dunida waxaa jira wadamo dadka iyo Booliska hubaysan yihiin iyo wadamo Booliska kaliya hubaysan yihiin, inagu markaynu Xeerarkeena samaysanayo waxaynu jecelnahay inaynu Wadamadaas hore u maray ee Maraykan iyo Chine ku dayano waayo hadaynu third world ku dayano iyo afrikaankan nin waliba kan kale calaashanayo dee waxaynu qabanay ma jirto, Tusaale hadaad Marayskan oo kale eegto Booliskiina wuu hubaysan yahay, dadkiina wuu hubaysan yahay oo hubkad dukaanka ka iibsanaysaa, Chine ah oo kale dadku ma hubaysna

Boolisku dadkay iska dilaan oo cid ka hadlaysaa ma jirto, aniga waxay illa tahay Somaliland guri aanu hubi oolin ma jiro markaynu dadka badankooda ka hadalno, wayna dhacday iska daa meel kale Hargaysa in hub waweyn Booliskii lagala horyimi.

Marka anigu waxaan soo jeedinaya sidii Xildhibaanadii iga horeeyayba in (1) Rasaastan rabadhka ah inay Boolisku helaan oo lixda Gobolba la geeyo, (2) inay helaan suntan loogu tallogalay rabshadaha ilayn xabad in la sito uun maahee, suntan dadka ee ka ilmaysiiyaaaa. (3) In la helo gawaadhidan lagu bakhtiiyo dabka ee dadkana lagu rusheeyo, marka saddexdaas la sameeyo dadkii badnaa ee dhibaatada waday way kala feerarayaan oo waxaa ka lumaya jihadii oo hawshii halkaasaa lagu qaboojin karaa, laakiin iyadoon kuwaasi jirin rasaas ha qaadanin oo ha ridin aniga ilama ah inay tahay wax meesha ku jirta. Waxaan halkaa odhan lahaa waa in la helaa xad ay rasaasta ku ridaan oo waa inay marka hore dulmariyaan oo qofka laabta iyo beerka kala eegan, hadii qofkii sii cararayo dee maaha inuu dhabarka ka toogto ee luguhuu ka toogan karaa, gacmuhuu ka toogan karaa, qolyahan rabshadaha ka hortagaana waxay leeyihiin dirays gooniya oo barigii xoogaa rabshadu Baarlmaankeenan ka dhacday dee waxay siteen waa inagii ogayn, waa in Qodobkaa la isu miisaamaa amniga Booliska , qofka shacabka iyo dadka rabshada kicinaya ee aan ahayn kuwa faldambiyeedka waawayn gaysanayaa hayn.

**Qodobka 8aad**, waxaan leeyahay Wasaarada Arrimaha ayuu Ciidanka Booliska line ministry la yahay oo Miisaaniyadooda oo kale halkaynu inagu u madaxbanaanahay Miisaaniyada, laakiin iyagu wasaaraday hoos yimaadaan markaa waa in ay Miisaaniyadooda Wasaaradu ka arrimiso, halka la leeyahay way ka madax banaan yihiin Wasaaradana anigu waxaan u arkaa inay tahay breakdown system oo sysytemkii khalkhalayo, hada inagoo madax banaan oo saddex dhardhaar ee Dawlada mid ka midda ah ayaa Miisaaniyadeena Wasaarada Maaliyadu gacanta inoogu haysaa waxay doonto ku darta waxay doontona ka jartaa inagoo Xeer kaga hoos saari karna, hadana system baa jira aynu raacno oo lagu shaqeeyo.

**Markaa Gudoomiye Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Gudiddaas la leeyahay waa loo cabanayaa inaynu halkaa hoos u eegno oo aynaan ka ogolaan Qodobkaas cabashooyinka wax Boolisku gaysto Gudidda loo gaynayaa ay noqoto Boolis, ee ay noqdaan kuwo ka madax banaan Booliska.

**Md. Maxamuud Ismaaciil Xasan:-** Gudoomiyaha, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Bahda saxaafada waan salaamayaa, dooddani mudo laba cisho ah bay socotay intii badnaydna waa la yidhi, runtii anigu meel yar baan ta'kiidayaa, taas iminka ugu dambeysay ee Cumar Sanweyne ka hadlayay ee **Gudidda Cabashooyinka** anigu waxaan qabaa inay Gudiddaas ka mid noqdaan Booliska in aanay haboonayn ee Gudiddaasi noqoto mid fair ah oo dhexdhexaad oo muwaadinkaas cabanaya uu kalsooni ka heli karo,

waxaan qabaa in Gudiddaas laga dhigo gudidii hore ugu jiri jirtay oo aynu hore ugu ansixinay kuna jireen xubnaha labada Gudi Nabaglayo ee labada Gole ee Baarlamaanku iyo garyaqaanadu, markaa anigu waxaan qabaa in Gudiddaas halkeedii loo daayo.

Arrinta Rasaasta, waxaan qabaa in taasi u baahan tahay miisaan oo dad mudahaaraadaya rasaas ha lagu rido ma qabo, waxaan qabaa in stage loo sameeyo goortay rasaas adeegsan karaan Boolisku, ma dhagax tuurayaa, ma dad boodhadh sitaa, dee nafta bini'aadamka ugu qiimo badan in Booliska la ilaaliyo weeye ixtiraam bay mudan yihiin, umadana la illaaliyo oo aanay si fudud u isaga dhiman, markaa in la miisaamo oo goorta xabad la ridi karo la cadeeyo ayaa haboon, laakiin dad mudaharaadaya in rasaas loo isticmaalo maaha ee wixii kale ee laga hortagayo ha lagu dedaalo, anigu waxaan qabaa rasaas waxaa loo adeegsan karaa xoog kaas la mid ah oo hub sita, wali digniin baan la siin karaa iyadoo microphone la adeegsanayo oo hubka dhig baa la odhan karaa, laakiin sidaas fudud in loo adeegsado ma qabo.

Arrinta kale, Boolisku sida la sheegay waxay hoos tagaan Wasaarada Arrimaha Gudaha Genana way leeyihiin, halka la yidhi xidigle laga bilaabo waxaa derajada siinaya Madaxweynaha anigu halkaas waan badali lahaa, ninka genanka ahi wuxuu awood u leeyahay inuu derajo bixiyo, in ninkii Xidiglaha ahaa Madaxweynaha la socdo ma qabo, waxaan soo jeedinayaa Kabtan wixii ka hooseeya inuu awood u leeyahay Taliyaha Boolisku inuu bixin karo. Waxa kale oo aan soo jeedinayaa Gudoomiya shuruucdan inaga baxda waxba inaga soo noqda, markaa halka waxaan odhan lahaa

**Nuqdad Sixitaan, Mudane Dable: -** Gudoomiye Derajadu sideedaba Degreeto Madaxweyne ayay ku soo baxda ee awood uma laha inuu bixiyo Taliyuhu wuu qadimayaa mooyee laakiin ma bixin karo.

**Md. Maxamuud Ismaaciil: -** Gudoomiye waxaynu ka hadlaynaa waa sharci oo Goluhu Sharci buu curinayaa markaa ra'yigaygu waa sidaa. Waxa kale oo aan ka hadlayaa ninka Taliyaha Ciidanka Booliska noqonayaa uu leeyahay shuruudo (criteria) lagu soo xusho ayaan qabaa anigu, inuu yahay muddo dheer Booliska ka tirsanaaa, nin aqoon, karti iyo hufnaan Booliska u leeyahay Booliska, inskastoo Ciidanku dhalinyaro wax bartay leeyahay hadana waa in seniority lagu soo xushaa, waan ka baxay.

**Md. Maxamed Cali Xirsi (Obama): -** Gudoomiye waxan ka hadlaynaa xeerka pbooliska ee ah 63 gudidu waxa ay inoo keentay wax ka badal iyo kaabis oo noqonaayo marka 16aad 17aad iyo 34aad 35aad 44aad 45aad 46aad, intaasi inoo keeneen gudida aan u dhiibnay, waxa ay ku soo koobtay 9 qodob, waxay noqonaysaa 9 qodob maahee waxa ay u badan tahay inay la qaateen sidii ay xukuumadu keentay, labaduba way ina hor yaalaan.

Xeer gabigiisaba markaad isku darto waxaan filayaa inuu 10 cutub yahay oo 48 qodob ka kooban, maxa inoo diidayo inaynu ka gudida eegno, ka xukuumada eegno, iyo inaynu

eegno xeer koo dhana wax inoo diidayaa ma jiro, qodabada ugu muhiim san hadan kuba horeeyo, oo runtii aad moodo in tashanku uu haysto, ama xeerka Boolis ka ee ina hor yaala, oo ah gudida cabashada waxan u qaadanayaa sida ay gudidu keentay Ayaan ku racayaa anoo soo koobayaa, sida loo maraayo.

Waxan kale oo aan qaadanayaa oo seconded garaynayaa gudiyada faraha badan ee gobalada ka jiraayay sida uu Md xuseen Axmed Caydiid u dhigay oo one coment ka meel fadhidaa ee dhaq dhaqado oo mobile ah oo miisaaniyad leh, oo wasaarada arimaha gudaha hoos yimaada, oo miisaaniyadeeda loogu daro, waayo miisaaniyad laan ma socon karto.

Gudidaasi waa gudi shaqo badan qabanayso sidaa xuseen axmed caydiid u dhigay Ayaan ku raac sanahay

Hubka iyo awooda ciidanku markuu adeegsanaayo iyadana waxan ku koobayaa sidaa xuseen axmed caydiid u dhigay oo si ka qurux badan oo loo dhigi karaa ma jirto, hadii ay tahay process ka loo maraayo, iyo haday tahay sida loo isticmaali karaayo iyo awooda ay u isticmaalan ayan ciidanku waxan jeclahay inaynu qaaadano habka xuseen axmed caaydiid, uu usoo dhiga oo ay xildhibaanadaasi ka hadlaayay mar cirka loo ridaayo, marna dhulka dhulka loogu dhufanaayo inaynu habkaa qaadano.

Mudane gudoomiye waxan galayaa qodaba kale oo fara badan Ayaan halkan gudida uga soo jeedinayaa, qaar la badalaayo iyo qaar hore loo badalay, waxan soo qaadanaya.

**Cutubka 2aad** cinwaankiisaa oo ahaa **"Msuuliyadda kowaaad ee Ciidanka laga leeyahay"** Waxaan ka dhigi lahaa **"Msuuliyadda kowaaad iyo Ujeeddooyinka Guud ee Ciidanka laga leeyahay"**

**Qodabada 5aad iyo 6aad** waan isku dari lahaa waxayna wada noqonayaan **Qodabkaas Farqadiisa 5aad** waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo ***"Ciidanka Booliska waa qayb ka mid ah ciidamada jamhuuriyada Somaliland oo hoos yimaada Wasaarada Arimaha Gudaha"*** waxan ognahay mudanayaal xeerarkan aan imika doonaynaa inaynu dajinaa waa xeerkii ugu waynaa ee Booliska, waana xeerkii lagu maamulayay Booliska, waana xeerkii loo raacayay Booliska, waana xeerki la raacayay waana xeerkii ugu awoodda badan, waxana ka wayn constituionka oo kaliya.

Waxa ku jira oo aan halkan ku arkayay had iyo jeer la refere-garayn karaa xeer-nidaamiyayaal, waxan qabaa waxa kaliya ee la tixraacayaa waa xeerkan marka ay arimaha Booliska noqoto, waxa kaliya ee aynu samayn karnaana waxa weeyi wax yaabaha qaar kood oo aan odhan karno xeer baa qeexaaya, xeer baa qeexaayi waxa weeyi waa xeer inaga inaga iman karo, maaha xeer meel kale ka imanaayo.

Xeer hoosaadka boolisku haysto, xeer hoosaad wasaarada arimaha guduhu haysato, xeer nidaamiyayaasha ay samaystaan halkan constituation laguma samayn karo. Xeer xeerkaa ka wayne haba yaratee oo constitutionka lagu samayn karaa ma jiro.

Imika ra'yi ayaa odhanaayay waxa lagu soo saari karaa wareegto madaxwayne, hadii constituionka ku qoran tahay waa sax, hadii wareegto madaxwayne lagu soo saaro waa sax iyada ayaan raacaynaa, hhadii uuna jirin waxa halkan xeer aan ku qorno ayaa noqonaayo, hadii uu wasiirka arimaha dibadu ku soo saaraaya taasa la raacayaa, hadii taliyuhu ku soo saarayaana taas baa la raacayaa taana aan sidaa u ogaano Ayaan anigu qabaa.

Waxaan lee yahay Boolisku ma madax baaneenee, Boolisku aduunyadoo dhan markaad eegto waa qayb ka mida wasaaarada arimaha gudaha ama uu hoos yimaado, xeerka waa inaynu ku cadayna oo ay ku qornaataa in wasaarada arimaha guduhu, ay maamusho oo uu hoos yimaado, sidaa darted aniga waxa ay ila tahay in arintaa ugu horaysee 5aad, (ciidamada Boolisku waa qayb ka mida ciidama jamhuuriyada soomaaliland hoosna yimaado wasaarada arimaha gudaha).

Mudane gudoomiye waxa kale cad in wasaarad kasta ama haayad kaste oo samaysata xeer in ay iyadu isku tilmaamto, ama ay iyadu isla eegto wixii iyada u dantooda u arkaan shaqadeena tahay inaynu kala saarno, inagay shaqadeena tahay inaan xududa u kala samayno, inagay shaqadeena tahay inaynu ku cadayna xataa awooda aynu leenahay ee uu golahani lee yahay inay xeer kaste ku cadaata muhiima.

**Qodabka 7aad iyo 8aad** waan isku daray waxaana ka dhigay **Qodabka 7aad** oo ah *Madax banaanindada iyo shakhsiyaadka ciidamada Booliska* waxaan anigu badalay Cinwaanka oo waxaan ka saaray shakhsiyaadka oo waxaan u badalay shakhsiyada qaanuuneed, wuxuuna isku noqonayaa **"Madax-babaanida iyo Shakhsiyada qaanuuneed ee Ciidanka Booliska".**

**Farqada 1aad** waxaan ka dhigay sidan **"Ciidamada Booliska wuxuu leeyahay jiritaan qanuuni ah, astaan iyo shaabad u gaaar ah, wuxuuna yeelan karaa hanti guurto iyo ma guurta ah, waxaanu ku gali karaa magaciisa heshiis kasta, kuna dacwoon karaa ama lahu dacwayn karaa".**

**Farqada 2aad Anigu** waan ka tuuri madaama aynu qirsanahay in aanay madax-banaanayn oo Miisaaniyad marto Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo maamulba ay Wasaaradaas hoos tagaan oo Wasiirku wuu ka joojin karaa hawlgal ama ma gali karo hawlgal ilaa uu u soo sheego Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha, **Farqada 3aad** iyada sideeda ayaan u daayay, marka farqada 2aad ee Qodobka 8aad oo markii hore ahaa 7aad waxaan leeyahay waa in sidaas meesha looga saaraa inagoo ilaalinayna jaran-jarada kala saraynta.

**Awoodaha madaxwaynaha ee ciidanka** oo ah **Qodabka 10aad** had iyo jeer xeerka waxaa ku soo noqnoqonaysa Taliyaha Guud, ma noqon karo Taliye Guud waa Madaxweynaha oo kaliya baa noqonaya Taliyaha Guud ee Ciidanka, marka halka isaga magac kale uma haye waxaa la odhan karaa taliyaha ciidanka uun, marka Farqada 1aad sideeda ayaan u daayay, **farqada 2aad** waxay leedahay ***"Madaxwaynuhu waxa uu awood u leeyahay magacaabidda iyo xilka qaadista taliyaha ciidanka Booliska iyo ku xigeenadiisa, marka uu la tashado wasiirka wasaarada arimaha gudaha isla markaana tixgaliyo dastuurka iyo xeerarka u gaarka ah, sida uu dhigaayo qodabka 90aad farqadiisa 3aad xarafka (D) ee dastuurka jamhuuriyada soomaaliland.*** Waa dastuurku siduu dhigayo, taasi waxay kuu cadaynaysaa ciidanku inoo hoos yimaado Wasaarada Arrimaha Gudaha marka aynu ka ilaalino farqadaha yar yar ee aynu hoos dhigayno oo meel alaale meel ay ka yimadeen aan la garayna iyadoo Dastuurkii sidaas amray

**Farqada 3aad** waa darajooyin waxay ka hadlaysaa, xildhibaanadii iga horeeyay ku raacsanahay in wax kasta madaxweynaha bixinaya in la yidhaahdo in aanay fiicnayn, markaa madaxweynaha la bixinaya bilada ama darajooyin oo dhan bixinayawaa inagu ceeb, waxeenaba hadaynu kuwada xidhno Madaxweyne waxay noqonaysaa in aanay shaqadii fur-furmin oo wasiiradii iyo taliyayaashii uu igmaday aanay waxba noqon, marka inaga Xeerarkii samaynaynee wax walba inaynu eegno oo wixii dastuurku aanu sheegin awoodaha aynu qayb-qaybino Xeerarkana ku cadayno. Marka Farqadaas 3aad waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"Darajooyinka gashaanle ilaa wixii ka sareeya madaxwaynaha iyo digreeto ku soo saaraayo, marka uu la tashado wasiirka wasaarada arimaha gudaha" hadii aanay dastuurka ka horimanayna sidaas aynu dhigno.**

**Farqada 4aad** iyana waxay noqonaysaa *Madaxwaynuhu waxa uu ciidanka booliska ku hogaaminayaa siyaasada guud ee xukuumada isagoo uu raacaya dastuurka iyo xeerarka jamhuuriyada Somaliland.*

**Qaodabka 12aad** oo markaan qaar isku dardaray Qodobka 11aad noqonaya oo ka hadlaya doorka wasaarada arimaha gudaha ee ciidanka ku leedahay oo runtii markaad eegto kooban intoo badan aan ku sameeyaya wax ka badal waxna waan ku dardaray, wuxuuna noqonayaa sidan: - **Wasaarada arimaha guduhu waxay ciidanka Booliska ku lee dahay xilalkan iyo awoodahan hoos ku xusan: -**

**Farqada 1aad** waxaan ka saaray inta dambe ee Xeer-nidaamiyayaashiisa si waafaqsan ku qoran tahay, waxayna noqnaysaa sidan farqadaasi ***"Wasiirka arimaha guduhu wuxuu kala talinayaa madaxwaynaha magacaabista iyo xil ka qaadista talliyayaasha ciidanka Booliska iyo ku xigeenadiisa isaga oo raacaaya xeerkan"***waayo kay refer-garaynayaan kan buu noqonayaa oo inagu mrna refer-garayn mayno Xeer-nidaamiye, marka qaybta refergaraynta Xeer-nidaamiyaha waan ka saaray.

Inta kale Qodobkaas waxna waan ku dardaray waxna waan ka saxsaxay, wuxuuna guud ahaan qodobkaasi noqnayaa sidan:-

**Wasaarada arimaha guduhu waxay ciidanka Booliska ku lee dahay xilalkan iyo awoodahan hoos ku xusan:-**

1) Wasiirka arimaha guduhu wuxuu kala talinayaa madaxwaynaha magacaabista iyo xil ka qaadista talliyayaasha ciidanka Booliska iyo ku xigeenadiisa isaga oo raacaaya xeerkan.
2) Maamulka ciidanka Booliska waxa uu hoos imanayaa wasiirka arimaha gudaha oo ku leh waajibadkan iyo awoodahan hoos ku xusan:-
    a. Horumarinta iyo kobcinta ciidanka Booliska soomaaliland
    b. Ka hawl galida in la daboolo baahida agabyada kala duwan ee ciidanka Booliska.
    c. Ka shaqaynta sidii fursada waxbarasho dibadeed iyo kuwa gudaha ahba loogu heli lahaa ciidanka Booliska.
    d. Curinta xeerarka, istaraatijiyada iyo siyaasada horumarinta ciidanka Booliska iyo hawl-galinta ansixintooda.
    e. Isku xidhka ciidanka Booliska iyo haayadaha kale ee xukuumada.
    f. Soo saarista xeer nidaamiyayasha xeerkan iyo xeerar kale ee ciidanka Booliska awood u siinaayo.
    g. Kormeerka iyo hubinta `habsami u socodka hawlaha ciidanka Booliska Somaliland.
    h. La socodka xaaladda nabad galyo iyo hubinta in ciidanku guud ahaan hawshoodii u gudanaayo si waafaqsan xeerkan iyo dastuurka Somaliland.
    i. Sugidda iyo kuur galida fulinta shuruucda, xeerarka iyo dhaqan galka amarada ka soo baxa golayaasha qaranka ee jihaysan ciidanka Booliska.
    j. Hagida iyo hogaaminta siyaasada guud ee ciidamada Booliska.
3) Kormeerka baadhista miisaaniyada, xisaab xidh yada, hantida ciidanka Booliska,
4) Darajooyinka gashaanle iyo wixii ka hoseeyo wasiirka arimaha gudaha ayaa digreeto ku soo saaraayo, marka uu la tashado taliyaha ciidanka Booliska.
5) Waxa uu digreeto ku soo saarayaa darajooyinka ka sareeyo xidigle, marka uu la tashado taliyaha ciidanka ogaysiina uu siiyo madaxwaynaha jamhuuriyada Somaliland.
6) Waxa uu bixinayaa bilad sharafeed yada iyo abaal marinada ay mutaystaan xubnaha ciidanka Booliska ahi, ka dib marka uu la tashado taliyaha ciidanka Booliska.

**Qodabka 13aad ee Awoodaha iyo masuuliyada taliyaha ciidanka Booliska** anigo qaatay farqadan xukuumada waxan ka badalay waxna ku daray Taliyaha ciidanka Booliska, waxa uu leeyahay awooddahan iyo masuuliyadahan hoos ku xusan: - **wax ka badalay farqada 3aad iyo 8aad**

**Farqada 3aad** waxaan u badaly sidan **"Wuxuu lee yahay awoodda magacaabista, xil ka qaadista iyo isku badalka madaxda hoggaanadda ciidanka, taliyayaasha qaybaha iyo**

**laamaha kala duwan ee ciidanka, ka dib marka uu kala tashado wasiirka arimaha gudaha"**

**Farqada 8aad** iyana waxaan u badalay iyana **"Taliyaha ciidamada Booliska waxa uu wasiirka arrimaha gudaha si joogta ah, warbixino qoraala uga siinayaa xaaladaha nabadgalyada guud ee dalka ku sugan yahay:**

**Qodabka 13aad oo** ah Awoodda_iyo Masuuliyadda Taliayaha Ciidanka Booliska, anigu halkii taliyaha guud waxaan ka dhigay taliyaha ciidanka Booliska, waxaana wax ka badalay farqadahan.

**Farqada 3aad** oo aan ka dhigay ***"Wuxuu leeyahay awoodda magaacista, xil kaqaadista iyo isku bedelka madaxda hoggaanadda Ciidanka, taliyeyaasha qaybaha iyo laamaha kala duwan ee Ciidanka ka dib markuu la tashado Wasiirka Arrimaha Gudaha"***

**Farqada 8aad** ooa ahayd sidan "Waxa uu Madaxweynaha iyo Wasiirka Arrimaha Guddaha la socodsiinyaa xaaladaha nabadgalyada guud ee dalka" waxaana u badalay **"Taliyaha Ciidanka Boolisku wuxuu Wasiirka si joogto ah Warbixin qoraal ah ka siinayaa xaalada guud ee Nabadgalyada dalku ku sugan yahay"** taasna jran jaradii baan ilaaliyay sida xildhibaankii iga horeeyayba sheegay.

**Qodobka 14aad_ee isna ka hadlaya** Awoodda Iyo Masuuliyadda Taliye-Ku-xigeenadda sidiisa ayaan u daayay qodobkaas waxa kaliya oo aan ka saaray taliye guud oo aan ka dhigay **"Taliyaha Ciidanka Booliska"** sidaan hore u soo badalay waxaana u daynayaa shaqaalaha inay dhamaan taliye guud u badalaan taliyaha ciidanka.

Gudoomiye Qodob cusub baan ku soo daray sidii xildhibaankii iga horeeyayba sheegay ninkaa Taliyaha Ciidanka waa inuu yeesho shuruudo lagu soo xusho kuwaasna Xeerkan baa u samaynaya, waana in aanu Madaxweynuhu iska qaadan qofkuu doono, xeer u raacona waa inuu jira qofka uu taliyaha u qaadanayo iyo siduu u eekaanayo, markaa **Qodobka 15aad** oo noqonaya **Shuruucaha loo raacaayo xulashada taliyaha ciidanka nabad galyada ayaan ku soo daray iyadoo guud ahaan qodobkaasi noqonayo.**

**Qodobka 15aad** Shuruuduhu lagu xulanaayo taliyaha ciidanka Booliska Somaliland waa kuwa hoos ku xusan:

1) Waa inuu yahay muwaadin Somalilandu dhashay ama qaatay jinsiyada Somaliland si sharciga waafaqsan.
2) Waa inuu muslin yahay kuna dhaqmo diinta islaamka.
3) Waa inuu dadiisu ka yarayn 40sano sanadka loo dhiibay xilka.

4) Waa inuu jidh ahaan iyo caqli ahaan ba gudan karo xilkiisa.
5) Waa inuu yahay xilksa, akhlaaqdiisa iyo dhaqankiisuba toosan yihiin.
6) Waa inaanu ku dhicin xukun ciqaabeed oo kama danbays ah shanti sano ee u danbeeyay.
7) Waa in uu lee yahay aqoon jamacadeed haystana ugu yaraan shahaado jamacadeed, amaba uu lee yahay khibrad ciidan ugu yaraan 15 sano.
8) Waa in uu la haado khibrad ciidan isla markaana uu aqoon u lee yahay:-
    a) Danbi ciqaabeedka
    b) Xeerarka dalka u yaalla
    c) Dhaqaalaha iyo maamul wanaaga

**Qodabka 16aad** isna wuxuu noqonaya shuruudaha Taliye xigeenka wuxuuna kala mid noqonayaa Taliyaha marka laga reebo khibrad ciidanimo oo isaga noqonaysa 10 sano, inta kale shuruudaha waa kala mid taliyaha.

Cutubka 5aad dhamaantiis waxaan u daynayaa siduu hore Xeerka ugu jiray ee aynu ku ansixinay.

**Qodabka 16aad** oo isna lambarkiisu isbadalayo madaama aan laba qodob ku soo daray halkaasna, wuxuu ka hadlayaa **Awoodaha ciidanka Booliska, waxaan wax ka saaray Farqada 1aad** oo aan ka saaray **"iyo Xeerka Ciqaabta Guud" iyo Farqada 3aad** oo aan ka saaray kalmada **"xoog iyo awood"** sidoo kale Qodobkaas waxaan ku soo daray 7 farqadood oo cusub kana bilaabmaya **Farqada 11aad illaa iyo farqada 18aad waxayna noqnayaan kuwan: -**

11. Ciidanka Bolissku waxay Xarumaha Boliiska ugu yeedhi karaan qof kastoo ay u arkaan in uu fal-danbiyeed Makhraati ka noqon karo iyagoo qoraal ahaan u adeegsanaya.
    a. Haddii uu qofkas Makhraatiga loogu yeedhay uu dido kuna I man waayo waqtigii loo qabtay, amaba uu ka jawaabi waayo Su'aalahii la waydiiyey Qofkaasi waxa uu noqonayaa Danbiile
    b. Ciidanka waxaa Ku waajiba in ay ka qoraan warbixinta, kana saxeexaan ka dib markay ugu Akhriyaan Luqada uu ku hadlaayo una sheegaan in ay u isticmaalayaan Evidence Maxakamada Horteeda
    c. Xubnaha Ciidanka Boliisku waxay qoraal ahaan qofka Makhraatiga ah ugu sheegayaan Maalinta iyo waqtiga ay ubaahan yihiin in uu ka soo xaadiro Maxakamada
    d. Haddii uu qofkii Makhraatiga ahaa uu ka soo xaadiri waayo Maxakamada waqtigii loo qabtay qofkaasi waxa uu noqonayaa Danbiile.
12. Ciidanak Poliisku waxay ka qaadan karaan sawiro, Fingerprints and Forensice evidence qof kastoo eedaysane ah hadii ay u baahdaan
    a. Haddii uu diido Eedaysanuhu in laga qaado take photographs, fingerprints and forensic evidence waxa uu noqonayaa Danbiile

b. Ciidanka Nabadgelyada waxaa ku waajiba in ay ilaaaliyaan Xafidaana Documtska ku xusan Farqada Sare
c. Xubnaha Ciidanak Nabadgelyada waxaa ku waajiba in ay Burburiyaan amaba baabiyaan dhammaan xogtii laga qaaday Eedaysanaha Hadii lagu waayo fal-danbiyeed kii loo haystay

13. Ciidanaka Nabadgelyadu waxay awood U leeyihiin in ay Joojiyaan isla markaan Ay baddhaan qof amaba Gaadhi kasta oo ay u arkaan in ay ku dhex jiraan Fal-danbiyeed yo.
14. Ciidamada Ilaalda Nabadgelyda aan ku labisnayn Labiska Ciidanka waxaa Ku waajiba in ay Qofka tusaan Kaadhka Aqoosiga Boliiska kuwaasoo ay ku cad yihiin Magaciisa, Ciidanka uu Ka tirsan Yahay iyo ID NUMBARKA CIIDANAK.
15. Haddi uu qofku diido in la baadho amaba uu gaadhiga joojin wayo qofkaasi iyo gaadhigaasiba waxay noqnayaan Danbiile.
16. Ciidamda Illalda Nabadgelyada waxaa ku waajiba in ay warbixino qoraala ka sameeyaan waxa uga soo baxay Joojinta iyo baadhitaanka mar kastoo ay sameeyaan.
17. Ciidamada Nabadgelyadu waxay Awood u leeyihiin in ay xidhaan haddi ay ku helaan in uu ku dhexjiro fal-danbiyeed iyo.
18. Qofku xaq buu u leeyahay in uu cabasho ka muujiyo haddii uu u arko in Xubinta Ciidanku ay ku xad gudubtay.

**Qodobka 21aad** oo isna ka hadlaya **Derajada iyo Kala Saraynta Ciidanka Booliska,** madaama aynu kala cadaynay derajada sida loo kala bixinayo waxaan isna ku cadaynayaa Darajooyinka Madaxweynuhu bixinayo iyo kuwa aynu Wasiirka Arrimaha Gudaha awoodiisa ku kordhinay wuxuu noqonayaa qodobkaasi oo isna ka dhigay sidan: -

1. Derajada Ciidanka booliiska iyo shuruudaha bixinta darajooyinka waxa decreeto ku soo saaraya: -

   a. Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland.
   b. Wasiirka Arrimaha Gudaha
   c. Taliyaha Ciidanka Nabadgelyada.
2. Xubnaha Ciidanka Booliisku waxay u kala amar qaadanayaan sida ay u kala derejo sareeeyaan.
3. Haddii laba qof oo Ciiddanka Booliiska ka tirsani isku darajo noqdaan waxay u fullaysaa kala amar-qaadashadooda sida ay derejada ugu kala hor qaateen, haddii ay mar wada qaateena sida uu magacooddu uu ugu soo kala horeeyo liistadda.

Gudoomiye Qodobada aan ku soo gabo-gabaynayaa waxay yihiin, Waxaan labadii Qodob ee ugu muhiimsanaa ku raacay xildhibaanadii iga horeeyay gaar ahaan Xildhibaan Xuseen Caydiid kuwaas kala ah Qodobka Gudidda Cabashada iyo processka loo raacayo iyo Qodobka Hubka iyo Xabad isticmaalkeeda.

**Cutubka 9aad** ayaan isaga sida loo dhigay si aan ahayn ka dhigayaa, cutubkaas oo dhanaya **Hantida sida Qalabk, Hubka iyo Miisaaniyada,** Marka waxaan u qabaa in intaasi aanay meel wada galin oo qalab, hub iyo miisaaniyad aanay is raacin mar kaliya oo aan kala saaray Qalabka iyo Hubka Miisaaniyada aan u qaatay Cutub gooniya oo ah **Cutubka 10aad ee Miisaaniyada iyo Xisaab Xidhada Ciidanka Booliska.**

**Qodobada 38aad Farqada 3aad** ayaan wax ka badalay oo waxaan ku sii daray **"wuxuuna qoraal ahaan ugu gudbinayaa Wasiirka Arrimaha Gudaha". Qodobada 39aad, 40aad iyo 41aad iyaga waxba kama badalin.**

**Markaa anigua Qodabada 42aad, 42aad iyo 43aad waan laalay waxaana ku badalay Cutubka cusub ee Miisaaniyada iyo Xisaab xidhada Ciidankaas waxayna noqonayaan saddexdaas qodob sidan soo socota: -**

## CUTUBKA 10AAD
## MIISAANIYADA IYO XISAABXIDHYADA CIIDANKA NABADGELYADA

### Qodobka 41aad
### Dhaqaalaha ciidanka booliisku wuxuu ka iman karaa

a) Xaddiga miisaaniyada Qaranka looga qoondeeyay Booliiska
b) Kaalmo xukuumada dhexe ku kabto
c) Kaalmo D/hoose ku kabaan
d) Qormada ganaaxyada sharcigu uga qoondeeyay

### Qodobka 42aad
### DIYAARINTA MIISAANIYADA CIIDANKA NABADGELYADA

1. Taliyaha Ciidanaka waxaa ku waajiba in uu Diyaariyo Miisaaniyad Sanadeedka 4 bilood ka hor int aanu bilaabmin Sanadku isla Markaan uu u Gudbiyo Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha Ka dib Marka uu Wasiirku Darso Miisaaniyada Ciidanaka Nabadgelyada waxa uu nuqul saxeexan siinaya Wasaarada Horumarinta Maaliyada si loogu daro Miisaaniyada Guud ee Qaranka
2. Haddii Wasiirku ku arko wax ka qaldan qaab ahaan amaba aan waafaqsanayn habka Miisaaniyad samaynta iyo Sharciga Xisaabaadka wuxuu xaq u leeyahay in uu ku celiyo Taliyaha isagoo talo iyo Tilmaamo Raacinaaya.
3. Wasaarada Arrimaha Gudaha ayaa U dejinaysa Xisaabaadka Ciidanaka Nabadgelyada Xeer Nidaamiye U Gaar ah oo waafaqsan Xeerka Maaliayada Dalka Jamhuuriyada SomaaLiland

### Qodobka 43aad
### XISAAB-XIDHKA MIISAANIYADA CIIDANKA NABADGELYADA

1.Wasiirka Arrimaha Gudahu wuxuu abuurayaa hanti-dhawr gudaha ah (Internal Auditor) oo gaara dhamaan Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Haydaha Hoos

Yimaada oo ay Ku jiraan Ciidanaka Boliiska oo ka kooban ashkhaas aqoon dheer iyo waaya'aragnimo u leh xisaabaadka oo si waqtiile ah ama mar kasta oo loo baahdo shaqayn kara.

2. Wasiirka Arrimaha Gudahu Wuxuu Awood u leeyahay Kormeerka iyo Baadhista Hantida, Shaqada iyo hubinta fulinta shuruucda, xeeraka iyo siyaasada guud EE CIIDANKA Nabadgelyada
3. Wasaarada Arrimaha Gudahu waxay Awood u leedahay Baadhista Maamulka iyo Miisaaniyada iyo Mashaariicda ay Hay'adaha Madaxa banaani ugu deeqeen Ciidanaka Nabadgelyada
4. Taliyaha Ciidanku waa in uu u gudbiyaa Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha Xisaab Xidhka Miisaaniyada Ciidanka Nabadgelyada iyo Miisaaniayada ka madax banana ta qaranka ee ay ku caawiyeen Hayadaha Mdaxa Banaanin haday ahaato Mid Bileed, Saddex Bileed iyo Sanandeedba
5. Hantidhawraha Guud waxa uu awood u leeyahay baadhista Maamul iyo Maaliyadeed ee Guud Ahaan Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Dhamaan Ciidamada hoos Yimaada.

**Qodobka 44aad**
**GUDDOONKA DEEEQAHA**

Taliyaha Ciidanku waxa uu gudooni karaa Isagoo qoraal ahaana ugu Gudbinyaa Wasiirka Arrimaha Gudaaha deeq kasta oo uga timaada

a) Dawlada Dhexe
b) Hayadaha Caalamiga ah
c) Dadwaynaha amaba Jaaliyadaha
d) Hayadaha Maxaliga ah
e) Shirkadaha dibeda iyo Gudahaba

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Marti Sharaftaba ASC, runtii si wayn baa looga dooday Mudanayashuna aad bay u qeexeen Xeerka aniguna qodobo yar baan taabanayaa, tuaasale Derjada Gudidda baynu u saarnay sidaynu sida labada Gole Xubno Xildhibaano ah oo ka imanaya iyo Garyaqaano ah aniguna taas ayaan ayidsanahay, waayo derajadii markii la bixinayay aad iyo aad baa looga cawday cadaalad daro baahsan baa ka dhacday, marka si loo helo cadaalad oo dad aqoon lihi Cilmi-baadhis sameeyaan oo meeshii tagaan oo eegan in dadkii u qalmayaan in waxaas la siiyo ayaa muhiim ah.

Arrinta ah Hubka, inay hubka qaataan Ciidanku waa sax laakiin dad shacab ah oo aan hub haysan inay ku ridaan meesha kuma jirto, hadii ay timaadano waa in la sababeeyaa marka lagu ridi karo, laakiin qof muwaadin ah oo aan hubaysnayn in xabad lagu rido ma banaanaana ee yaanay dhicin, markay isticmalayaan waa in halka qodob sheegaya lagu daraa.

Waxa jirta Ciidanka Boolisku waa saaxiib dadweynaha marka waxaan odhan lahaa marka ciidanka Booliska la qoro oo kaadhkii la siiyo waa inay gawaadhida oo kale bilaasha ku raaci karaan sida basaska oo ay kaadhkii tusaan oo wax badan oo ka cawdaan darteed tixgalin loo siiyo ayaan soo jeedinayaa. Runtii intaas ayaan ku soo gabo-gabaynayaa.

**Md. Maxamed Cumar Aadan (Jiir):-** Bismilaahi, Waxaan ka hadlayaa **Qodobka 16aad** oo iila muuqta mab'diyan wixii lagu dhaqmi jiray inay meesha ka baxeen, marka aniga waxaan odhanayaa oo ku saxayaa siday ahayd ee illa tahay, Marka Booliska fal ku dhaqaaqayo marka hore waa inay noqdaan dad involved ah oo loo soo sheegay dabadeedna Booliska laf ahaantiisu inay go'aan qaataan may ahaan jirine waxay ahaan jirtay dariiqa saxdana ahayd in Booliisku laba qolo la xidhiidho kuwaas oo kala ah Maxkamada ama Xeer-ilaalinta oo meesha hadii dambi ka jiro aanay iyagu isku koobine uu raacaa oo markhaati ka noqdaa oo uu waxaas waxaa fasax u siiyaan iyagu ayaan arki jiray sidaan dawladii hore ingriiska ka soo gaadhay, markaa waxay ila tahay intaanay meeshii isku qaadin oo qori soo qaadan oo hadhaw aanay kalsooni daro iman ay la tashadaan Maxkamadaha ama ciddii sahrciga uga wakiil ah oo kuwaasina la ogolaadaan inay ku dhaqaaqi karaan waxaas ama ka joogi karaan.

Arrinta labaad ee aan isleeyahay waa principle waxa weeye hadii Boolisku kaligood haday eed galaan dadku iyaga la xisaabtami maayaane waxay la xisaabtamayaan siyaasiyiinta, siyaasiyana hadba cid bay ku sii qoran yihiin Wasiirka Arrimaha Gudaha noqoto ama meel kale ha noqote waana inay marjac u noqotaa ilayn dad bay talaabooyin ka qaadayaane oo mar hadii meesha qori soo galay way toogan karaane qofkii ku qanci maayo hadhawto, dadkana waynu ognahay oo dhibaato badan baa jirta iyo in magacyo badan loo sheego inaan Golaha ka idhaahdo way foolxun tahaye, kuwaas oo keena in qofkii Booliska iska dhaqaaqo oo xabad nool isticmaalo, markaa waa inay labadaas qolo lala socodsiiyaa oo siyaasiga (politician) oo hadii eed dhaco isagu noqonaya dadku cid ay refer-gareeyaan iyo maxkamadaha oo la tashadaan oo ogolaansho ka helaan.

Hadii labadaba aanay ogolaansho ka heli Karin oo la socodsiin Karin way inay u caday sharcigay raacayaan oo aanay noqon mid yidhaahdaan sidaasan u jeednay iyo sidaasay iska noqotay oo dhacday si aanay beeni u dhicin, labada qodoba waxaan u arkaa inay keeni karaan kalsooni oo dadku Boolisku waxay qabanayaan ku kalsoonaad, maalin dhowayd waxaa dhacay nin doonayay in baadho alaab la xaday oo dawladu lahayd maxkamadu soo maray oo waxaa la soo siiyay waaran baadhiseed meeshii buu yimi kumuu dhicin illaa ninkii aqalka lahaa iska eegay oo iska baadhay iyagiina wuu baadhay dabadeedna wuxuu yidhi waxaad doonaysaan waa maxay? Waa waxaas buu yidhi, intii aqalkiisii u horgalay buu meel walba faraha ka saaray markay wixii waayeen way iska noqdeen, taas oo kale kalsooni bay keenaysa in dadku Booliskii ku qabaan, laakiin hadii aanu cidna la tashan oo isagu yidhaahdo aniga sharcigii gacanta ku sita iskana soo qaado

oo wuxuu doono sameeyo, waxaana dhici karta inay arrintii si cadho leh u dhacdo oo dhib keento, markaa anigu intaas ayaan ka hadlayaa waxaan leeyahay marjacaa mab'aadiida ahaa ha lagu dhaqmo.

**Md. Cabdiqaadir X. Ismaciil Jirde: -** Idinku badin maayo oo anigu Gudiddana ka mid baan ahaa, xildhibaanadu si fiican bay u soo dedaaleen oo uga soo shaqeeyeen, inyar oo toosin iyo mulaaxadaad ah iyo galdaloolooyin xeerkana ku jiray kana muuqday doodihii, Xeerku meel cidla ah kamuu dhalan ee siyaasada Nabadgalyada Qaranka ayuu salka ku hayaa, Bilaysku waa qayb ka mid ah hay'addaha u xilsaaran Nabadgalyada haday gudo tahay iyo hadii ay dibad tahayba Markii loo baahdoba Nabadgalyada Qaranka.

Innagu Qaab-dhismeedka Bileyska aynu qaadanay waxaynu isku daynay intii tamarteena ahaydba inaynu madax-banaanayno, sababtuna waxay tahay waxaynu ka duulaynay wax hore inoo soo maray oo waxaynu ogayn dawladihii civil-ka ahaa ee ilaa 69kii oo markasta oo doorasho soo dhowaato in Bilaysku u adeegi jiray xisbi xaakimka oo taliye qaybeedyada iyo taliyayaasha saldhigyada la badali jiray oo nin Xildhibaan ah oo doorashada ku leh saamayn uu odhan jiray ninkaa halkaa ii geeya si uu doorashada ugu yeesho saamayn, wixii wax u eegna iminka waynu aragnay, markaas marka madax-banaanida laga duulayo waxa weeye in Siyaasadii iyo Bilayska la kala illaaliyo illaa xad, oo ood iyo dayr kala dhex dhigno intii tamarteena Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Bilayska oo Wasiirka Arrimaha Guduhu aanu Taliye qaybeedyada badali karin, aanu awaamiir aan haboonayn siin karin taliyaha, waayo hadii aynu ka madax-banaanayn wayno taliyayahaasi wuu habranayaa oo shaqadiisii baa ku xidhan miisaaniyadiisii iyo dalacaadiisii, iminka waxaan maqlayay Xildhibaan soo jeedinaya Miisaaniyadoobii gacanta in loo galiyo Wasaarada Arrimaha Gudaha.

Hadaynu taas samayn wayno waxaa iman doonta in taliyaha Qaybtu Badhasaabka ka amar qaato, kan degmada joogaana ninka degmada soo jooga ka amar qaato oo askarta dalacaadooda iyo xaqsiintoodu ay gacanta u gasho Wasaarada Arrimaha Gudaha. Hadii aan la xadidin power-ku maaaha neutral, markaa ilaa xad waxaynu isku dayaynaa illaa xad madax-banaanida Ciidanka Bilaysku damaanad qaad helo, Ingiriiska Bileysku waa decentralized Wasiirka Arrimaha Guduhuna Golaha Wasiirada ayuu u fadhiyaa oo Taliyuhu Golaha Wasiirada ma tagi karo, inaga taas oo kale Wasiirka waxaa loo hoos geeyay inuu wakiil uga noqdo Golaha Wasiirada oo aanay tagi karine shaqadooda waxay u madax banaan yihiin.

Ka hadli mayno siday maanta tahay ee waxaynu ka hadlaynaa siday mustaqbalka noqonayso, waynu ognahay maanta siday tahay, Xeerarka u samayn maynu maanta ee waxaynu u samaynaa mustaqbalka iyo in siday maanta tahay ay ka wanaagsanaato waxna ay ka badasho sida maanta loo dhaqmo, horta taasi waa sidaa. Waxa kale oo jira

had iyo jeer Bilayska iyo Ciidamada oo dhan waa inay jirta cid civil ah oo oversight ku leh siday hawsha u wadaan waana loo baahan yahay.

Waxa kaloo jira oo la isla wada qaatay in Bilaysku xad-gudub gali karo sida Xildhibaankuba xad-gudub u gali karo, qof xad-gudub macsuum ka ah illaa Madaxweynaha ma jiro , haduu Madaxweynuhu qawaaniinta ku gefo iyo midnimada qaranka ama amniga empitionment baa dastuurka ugu yaal in lagu qaado, cid laga dhaafayna ma jirto hadii ay xad-gudub la timaadob. Gudiddaas aynu soo saarnay ee Cabashada dadweynaha, Wixii ciidanka gudihiisa ka dhaca internal police unit baa oo askartay wax ka dhex dhacaan, askarta iyo saraakiishay wax ka dhex dhacaan ama decipline-kooda wax ka dhex dhacaan oo taas internal Police Unit baa leh, inagu taas shuqul kuma lihin ee waxaynu samaynaynaa inagu waa xad-gudubyada dadaweynaha loo gaysto ee ka bilaabmaya qabashadiisa marka la qabanayo hadii dhaawac loo gaysto, marka xabsiga lagu hayo hadii la jidh dilo, hadii jeelka wax ku soo gaadhaan oo uu xuquuqdiisii ku waayo independent Police unit baa jiraya waana ka xaaraan qof bilays ahi inuu jiroba, waayo ha'yaddii la baadhayay inay soo gasho maaha, waana mid cad oo aduunkoo dhan laga isticmaalo.

Marka sida Xildhibaanaduba sheegeen jaran jaradu yaanay inagu dheeraane bilaysku iminka wuxuu u dhisan yahay qaybo oo uu leeyahay, magaalooyinka waa laba qaybood oo Tog-dheer ama Burco waa laba qaybood baan u malaynayaa, Awdal sidoo kale waa laba qaybood baan filayaaa, marka aynu ku eekaano qaybta ee yaynaan hoos u daadegin, gudiddaasi ku salaysan oo dacwada ka soo bilaabaysa qaybta oo tan uun bay matalaysa oo u dhigantaa, taas wixii ka yimaada inay Gudidda Qaranka u timaado weeye oo labadaas jaranjaro ay marto uun.

Markaa aniga labadayda point waa sidaas, waa isku mid labada Ciidan ee Ciidanka Qaranka iyo Ciidanka Bilaysku, Ciidanka Qaranka Wasiirka Gaashaandhiga ayaa oversight ku leh, Ciidanka Bilayska waxaa ku leh Wasiirka Arrimaha Gudaha, labadii Wasiir isku xuquuq bay noqdeene yaan midna xuquuq dheeraada la siinin oo Wasiirkii Arrimaha Gudaha awood dheeraada loo siinin uu ciidankan ku maamulo, kii ciidanka ka wayn la odhan maamulkooda u daa oo aanay kala duwanaan saamaynta labada Wasiir labada Ciidan ku kala leeyihiin oo kala mudnaanin.

Tan kale, doodda dhinac baynu ka joognay oo dhinicii Bilayska kamaynu hadlin, ninka Bilayska ahi hadii aanu xuquuqdiisii helin xuquuqdaas maxaa ka mid ah? Isaga iyo xaassaskiisa iyo ubadkiisa wax ku filan hadaanu u hayn oo aanay daryeel haysan, aanu mushahar ku filan haysan, aanu caafimaad haysan, aanu hoy haysan, dee taasna Xeerka ha lagu daro oo yaynaan shabeel hub hayta ka dhigine waa inaynu isagiina qofaynaa oo daryeelkiisii iyo shuruudiisii ka fekernaa, sidaan raali looga ahayn inuu dadka ku tacadiyo oo xabad ugu dhufto aan isaga raali laga noqon in xabad lagu dhufto, meel walba bilayska waa la xakameeyaa, laakiinse waxaa lagau xakameeyaa ninka nin bilays

ah dhaawac u gaysta ama marka la qabanayo dagaal kala hor yimaada dambiguusu wuu inuu ka cuslaadaa dhaawac ama dhibta qof civil ah loo gaysto, dadka waxaa lagu xakameeyaa hadaad bilayskaa taabato dambiga lagu kordhinaya oo xadhiga lagu siyaadinayaa, tiina halkan kama muuqato, cidda booliiska kala hortimaada iska cabin marka la qabanayo waa cid qaranka Somaliland kala hor timi diidmo, marka dambigaasi dambi culus ha noqdo oo dambiyada ha loo cusleeyo cidda booliiska wax u gaysataa, si booliiskii looga waabto oo wax adkaynaya sharaftooda kordhin kara la helaa.

Tan kale waxa weeye agabkuu isticmaalayo oo hawsha ku qabanayo ma yahay agab ku filan, ninka booliiska ahi waa radio-gii haystaa, waa inuu bahashii xabd celinaysay haystaa, waa inuu koofiyadii haystaa, waa inuu gaadiid qoofalan haystaa, waa in Boolis wax kasta u dhamaystiran yihiin oo ay ka muuqato dawladinimadii uu meeshii tagaa, askari laakiin dacas sita oo waxba aan haysan cidna ka haybadeysan mayso, anigu ciidan baan ahaan jirey dee waa na lagu illaalin jiray waxaas.

Waxa kale oo jirta dalaacadaha iyo derajada oo aynu ka hadalnay, dalacaadu waxay ku timaadaa tababar oo marka askarigu alifka labaad qaadanayo kooras baa la galiyaa 45 maalmood ah ka bacdi uun buu dalacaada qaataa, markuu isbatoore noqonayo qaadanayo kooras baa lagaliyaa markasuu dalacaa, sidaas oo kale weeye xidigluhu oo illaa jananada ayaa koorasyo gala, markaa dalacaadu ha ku xidhnaato tababarkaas iyo imtixaan, siday maanta tahay waynu ognahay oo waxba ka odhan mayno, laakiinse waxaynu ka hadlaynaa mustaqbalka in dugsiyaadkii loo furo iyo kuliyadihii sido kalena jaamacadaas wax laga siiyo si askarigii iyo dalacaadiisii u wada ay wadda socoto.

Waxa jirta dalacaada, iminka Golaha Wasiirada uun bay tagtaa, anagu markaanu derajada qaadanaynay Ina Cali Samatar baa ku saxeexnaa inkasto isagu markaa ahaa taliyaha ciidanka iyo Wasiirka Gaashaandhiga, dalacaadu waa inay ku xidhnaato Tababar iyo Imtixaan oo barigii Ingriiska sidaasay ahayd oo Shiikh baa lagayn jiray.

Waxa kale Ciidamada marka la qorayo Xeerarkoo dhan way ku taalaaye in deegaamada Gobolada oo dhan inuu Ciidanku ka kooban yahay markaa marka la qorayo iyadoo istatistics la haysto aan melena loo badin melena lagu yarayn oo ciidanku sidan uu yahay laga badiyo oo macnawiyan Ciidan Qaran uu noqdo oo Gobolada ay ku badan yihiin inta la joojiyo marka la qorayo loo badiyo Gobolada ay ku yar yihiin la tago oo laga soo qoro, sidoo kale marka koorasyada la dirayo inaanu dhinac ka rarnaan.

Waxa kaloo jirta Taliyaha Ciidanka Boolisku saraakiil sar sare ayuu leeyahay, marka dalacaadyo iyo waxaas la galayo qofkii la iskama dalaciyo waxa la eegaa inta qofkaas recommendation laga keenay, shacab ha ka keeno, ama badhasaab ha keeno, ama umad uu wax la qabtay ha keentee inta waxaas oo dhan la ururiyo ayaa Gudi la hor geeyaa uu Gudoomiye u yahay Taliyaha Ciidanku oo taliyuhu kaligii xaq maaha inuu recommend-gareeyo ee waa inay wax ku salaysnaataa, yaanay ku salaysnaanin cabasho Suldaan

Wasiirka Arrimaha Gudaha u tagay oo cawday ee ha ku salaysnaato file la hayo, waayo sarkaal kasta file buu leeyahay loo galiyo wixii recommendation ah uu helo, wixii ganaaxa, wixii koorasyo uu helo iyo wixii uu imtixaan galay filekaasay ku jira, halka laga duulayaana waa filekaas oo hadii laba sarkaal la kala saarayo filekaas ayuu lagu kala saarayaa oo markasta Komishankaas ayaa ka talla-bixiya dalacaada ee Taliyuhu ma recommend-gareeyo, dalacaaduna waa inay ku xidhan tahay organic-gada Ciidamada.

Laakiin hadii Ciidanka Boolisku aanu gaas ka badnayn ay saraakiisha waaweyni ka bataan kuwa yar yar ciidankaasi ma shaqeeyo sida Masaarida, waxaa la sameeyaa rotion oo ninku markuu janan gaadho oo mudo shaqeeyo hawl kalaa loo diraa waayo inuu ciidanku korayaa, waa in aanay ka xidhnaan saraakiisha wax soo bartay oo rotion jiraa taliyayaasha ciidamaduna tobanaan sano meesha fadhiyin, aduunka meel kale kama dhacdo, waxaan maqlayay waa in Taliyaha Ciidanka laga dhiga 40 sano jir dee jananku 40 sanoba ma gaadho markay dalacaad tahay hadaanu garab kale haysan laguma gaadho janan 40 jirba, marka xadidaasna meesha ha laga daayo.

Anigoon ku fogaanayn, ujeeddaydu waxa weeye ciidanka iyo Siyaasada ha la kala madax-banaaneeyo, madax-banaanidaasi waxay ku imanaysaa markaynu isaga iyo Wasaaradii u kala samayno xayndaab, hadii kale waxaad ogaydeen in taliyihii kan ka horeeyay uu ku yidhi hebel halka ka qaad oo hebel halka gee oo mark saqadhi uu yidhi iga tirso Madaxweyne hadii Wasiirku kala badalayo, taas ayaynu ka cararynaa, hadii aynu sidaa samaynona waxaad arki doonaa iyadoo Badhasaabkii iyo gudomiyaha degmaduba ay dhexda ku martaan shaqadii Booliska.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha Waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
-------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSl**
-----------------------------------------